# FARTA SOOMAALIGA

**WD: Cabdinuur Cabduqaadir Maxamed**

Ka dib markii ay diyaariyeen guddigii qorista farta soomaaliga agabkii looga baahnaa, haddii ay ahaan lahayd buugaagta asaasiga ah ee barashada qoraalka afka Somaliga kuwaa oo lagu saleeyay sida ay Soomaalidu ugu dhawaaqdo xarfaha, erayada, fahamka ujeedada erayga iyo oraahda ee loo yaqaan (naxwa), sugaanta, sheekooyinka IWM. Markii intaa oo dhan laysla helay, waxaa loo baahday in la dardar-geliyo sidii uu qoraalka ku baahi lahaa guud ahaan dalka si loo gaarsiyo muwaadin kasta meel kasta oo uu wadanka kaga sugan yahay/tahay balad iyo baadiyo ama miyi iyo magaalo. Waxaa la go’aamiyay in la qaado mid ka mid ah hawlgalladdii ugu waynaa ee ay dawlad Soomaaliyeed qaaddo ebed Ololaha “xamla” qorista afka Soomaaliga. Fulinta iyo ka mira dhalinta arinkan ayaa ka mid ahaa arimahii ay ku taamayeen saraakiishii af-gambisay xukuumadii rayidka ahayad ee la magac baxay Golaha Sare ee Kacaanka Soomaaliyeed. Khudbad daah-fur ah oo uu shacabka u jeediyey Sarreeye Gaas Max’ed Siyaad Barre ayuu ku saleeyay hal ku-dhig “Bar ama Baro” si shacabka Soomaaliyeed u wada tiigsadaan iftiinka aqoonta si looga baxo aqoon yarida “jahliga” si dadku u wada karaan/awoodaan astaanta hormarka ee ah qoris iyo akhris.

Si ujeedadaa loo gaaro, taliska sare ee Kacaanka wuxuu faray in la hawlgeliyo arda dugsiyada dhexe, sare, macaahidda sare ee xirfadaha gaarka ah lagu baranaayay, ardayda jaamacadda Umadda iyo dhammaan macallimiinta Soomaaliyeed heerarkooda kala duwan. Waxaa albaabada loo laabay dhammaan goobihii waxbarasho ee uu dalku lahaa iyadoo loo weeciyay sanad dugsiyeedkii 1973-74 baridda

shacabka Soomaaliyeed qorista iyo akhriska farta Soomaaliga. Waxaa loo wada dhaqaaqay/kicitamay degaanada reer guuraaga "miyiga" iyo beeralayda tuulooyinka degan. Dawladda Kacaanka oo gacan wayn ka helaysay shacabka Soomaaliyeed ayaa ka soo hooysay guul wayn oo taariikhi ah oo ay dunidu wada qirtay. Qiimayn ay hormuud ka yihiin hey'ado caalami ah ee daneeya sare u qaadidda aqoonta iyo hormarka bulshooyinka ayaa caddeeyay in Ololaha Hormarinta Reer Miiga uu kor u qaaday aqoonta dadka Soomaalida. Waxaa sare u kacay awoodda akhriska iyo qoridda dadka Soomaaliyeed, hore dadka wax qora ama akhriya waxay ka ahaayeen bulshada inteeda kale 2% (boqolkiiba laba). Ololaha ka dib tiradaa oo is bedeshay ayaa gaartay 55% (kontan iyo shan boqolkiiba), sidaana Soomaaliya waxay ku gashay kaalin wayn dalkana ka mid noqday wadamada hoos u dhigay waxa loo yaqaan "Ummiyad".

Guusha Ololaha laga soo hooyay si ay u noqota mid taabba gasha, waxaa tallaaba dhidibba aasid ah qaaday Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta si ay u xoojiso siyaasadda hoggaanka sare dalka. Wasaaradda waxay magacawday waax u gaar ah qorista iyo diyaarinta bugaagta manaahijta, si manhajka waxbarashada ee dalka oo dhan u noqdo mid ku qoran luqada iyo farta Soomaalida. Waxaa loo magacaabay xilka madaxa waaxdaa oo ahayd hawl ugub ah aqoon yahan Soomaaliyeed oo lagu magacaabi jiray marxuum Dr. Xasan Daahir Obsiye, mudanaha isla markiiba wuxuu qaaday hawl gogol xaar ah si uu uga soo dhalaalo xilkaa. Wuxuu diyaariyay macalimiin takhasusiyo kala gedisan lahaa, aqoontooduna sarayso, hawshana u hayay niyad dhalisay in ay la yimaadaan

dulqaad dheeraad ah si ay u dhabowdo yididiilada Wasaaradda iyo rabitaanka hoggaanka sare ee dalka.

Waxaa sidaa ku suurtoobay in loo rogay sida uu u dhammaa manhajkii waxbarashada ee Jamhuuriyadda Dimoqoraadiga Soomaaliya ee dugsiyada hoose, dhexe iyo kuwa sare. Waxaa sidaa ku dhaboobay in caruurta Soomaaliyeed ay wax ku bartaan afkooda hooyo "biya gacmahaaga ayaa looga dhargaa", barashada afafka kalana ayaa la go'aamiyay in ay ku koobanaadaan maadooyinka afka sida afka Carabiga oo ahaa afka labaad ee dalka iyo afka Ingiriiska oo loo tix-geliyay in uu yahay af caalami ah oo ay barashadiisa lama huraan tahay. Tallaabadaa markay fushay, waxaa albaabada layskugu dhuftay dhammaan iskooladii dalka ka furnaa ee ay duruustoodu ku baxi jirtay afafka qalaad. Waxaa la af Soomaaliyeeyay manhajkii waxbarashada Dusiga Sare Tababarka Macallimiinta Xalane, Kulliyadda Siyaasadda Jaamacadda Umadda, Kulliyadda Ciidamada Qalabka sida "Jaalle Siyaad", Dugsiga Sare Boliiska, Kulliyadda Sare Abaan-duulka Ciidamada, Kulliyadda Sare ee Istiraatijayada.

Hayeeshee, go'aanka guud ee af-Soomaaliyaynta manhajka waxbarashada waxaa laga reebay labadii nidaam waxbarasho ee ay gacanta ku kala hayeen Wasaaradda Waxbarashada Masar sida Dugsigii magaca waynaa ee Jamaal Cabdi-Naasir iyo dugsiyadii dhexe/sare ee sida badan magaala madaxyada gobolada dalka ka furnaa ee ay maamulaysay hay'adda magaca wayn ee Al-Azhar Al-Shariif ee Masar. Manhajka waxbarasho ee heerka Jaamacad ayaa loo daayay in uu ku socdo afka Talyaaniga gaar ahaan kulliyadaha laamaha cilmiga "science", qaanuunka iyo dhaqaalaha, halka afka Ingiriiska wax looga baran jiray kulliyaddii

waxbarashada iyo beeraha ee Lafoole iyo macaahidda lagu baran jiray xirfadaha gaarka ah sida Dugsiga Sare Badda, Dugsiga Sare Caafimaadka dadka iyo Xoolaha, Dugsiga Sare Beeraha, Dugsiga Sare Farsamada iyo afka Carabiga oo lagu baran jiray takhasusyo gaar ah oo manhajka kuliyada waxbarashada ka tirsan iyo kulliyaddii Daraasaadka Islaamka.

Iyadoo la raad raacaya guusha taariikhiga ah ee uu qaranka Soomaaliyeed hore ugu tallaabsaday ee lagu dhaqan geliyay qoraalka af-Soomaaliga, ayaa Sanadkii 2012ka waxaa dalka jabuuti lagu qabtay xaflad lagu xusay sanad guuradii 40aad ee ka soo wareegtay qorida farta Soomaaliga. Munasabadaasi waxaa loogu daah furay qaamuuska ugu wayn oo af Soomaali ku qoran inta ilaa hadda la ogyahay. Sidaa darteed, waxaa jira oo weli socda talooyin wax ku ool oo lagu doonayo in lagu dhameystiro hawsha qabyada ah ee la xiriirta qorista afka Soomaaliga waana sidan:-

1- Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya wuxuu amraa in la hormariyo afka Soomaalida lana dhiiri-geliyo lahjadaha kala duwan ee ay dadka Soomaalidu ku hadlaan, si uu hore ugu durgo fahamidda waxa qoran iyo is af-garashada bulshada dhexdeeda.
2- Dantu waxay tahay in la horomariyo farta soomaaliga xawliga hormarka ee ay dunidu ku tallaabsanayso maalin walba dartiis, baahiduna tahay in farta Soomaaliga la casri-yeeyo.
3- In dib loo eego si loo helo eray bixin sax ah iyadoo la dhawrayo kala duwanaata degaanada taa oo sare


loogu qaaddayo qoraalka af Soomaaliga.

4- Hormarinta af Soomaaliga ayaan looga maarmin adeegsida culuumta iyo tiknoloojiyada casriga ah.
5- Waxaa baahi loo qabaa in la dhiirri geliyo hidaha iyo dhaqanka iyadoo la dhowraayo/tixgelinaayo dhammaan dhaqamada, xirfadaha iyo caadooyinka kala duwan oo afka Soomaaliga ka dhigay mid hodan ah, si dadka u dareemaan in afku yahay wax la wada leeyahay, degaan u gaar ahayn cidna aysan marti ka ahayn.
6- In laga faa'idaysto xasuusta xubnaha ka nool guddigii qoraalka farta Soomaaliga, lana siiyo qadarin iyo maamuus ay mudan yihiin.

Taariikhdu markay ahayd 10/2/2015, Mudane Xasan Sheekh Maxamuud ayaa shir jaraa'id ku qabtay Xarunta Madaxtooyada Villa Soomaaliya. Munaasabadaa ayuu Madaxwaynaha ku bixiyay amar in af Soomaaligu yahay afka kaliya ee rasmiga ah oo lagu adeegsado xafiisyada dowladdda. Hadalka Madaxwaynaha ayaa ku soo beegmay xuska sanad guuradii 42aad maalinta warbaahinta Soomaaliyeed oo ku beegnayd 21kii janaayo sanadkii 1973dii oo ahayd maalintii ugu horeysay ee uu soo baxay wargays af soomaali ku qoran. Madaxwayne Xasan ayaa qiray in qorista af Soomaaliga ay ka mid tahay guulaha uga wayn ee uu dalku gaaray tan iyo madax-bannaanidii dalka.



Waxaa taa daba joogay dhagax dhiggii Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Jabuuti Mudane Ismaaciil Cumar Geelle iyo Madaxwayne Xasan Sheekh Maxamuud ay wada dhagax dhigeen Akadeemiyad Goboleedka Afka Soomaaliga (AGA) taariikhdu markay ahayd 21/02/2015. Labada madaxwayne ayaa si wada jir ah ugu taamaya in Akadeemiyaddu noqoto hoy isku xira dhammaan dadka afka Soomaaliga ku hadla ee ku kala dhaqan Soomaaliya, Jabuuti, Itoobiya, Kenya iyo Jaaliyadaha wadamadaa ka soo jeeda ee ku nool wadamada caalamka.



Akadeemiyadda (AGA) waxaa hore loogu asaasay dalka Jabuuti bishii juun sanadkii 2013, hayeeshee, waxaa lagu abaal mariyay magaalada Xamar "Muqdishu" kaalintii taariikhiga ahayd ee ay ka soo qaadatay kobcinta aqoonta, ilaalinta sharafta, nabad-gelyada iyo madax-bannaanida dadka ku hadla afka Soomaaliga. Akadeemiyadda (AGA) waxay u taagan tahay in ay noqoto xarun dib loogu baadi goobayo wada jir iyo hormar ka duwan kii hore, dantuna ku soo aruurtay in la wada ilaashado lana hormariyo waxa la wada leeyahay ee ah afka iyo dhaqanka Soomaaliga.



## HOOYGA NOOLAHA BADDA KU NOOL (MARINE HABITAT)

W/D: Xasan Maxamed Xasan

Hoyga waa meel gaar ah oo noole ama koox noole ah ku nool yihiin, hadaan si kale u sheego hoyga waa goobta uu noolaha ku aamino inuu dhigto ukumahiisa, hadaba noolaha badaha waxay lee-yihiin hoy ay galaan oo la mid ah hoyga noolaha barriga.

Ku dhawaad 71% dhulka waa biyo, sidaa darteeda waxaa lagu magacaabaa "dhulka baluuga ah" (The blue planet), ku dhawaad 96% biyaha dhulka waa kuwa badaha. dhulka baaxadaas dhan ee biyahu ku fadhiyaan waxaa ku nool noole aad u fara badan, dabcan waxaana ku yaala tiro aad u badan oo hoyga noolaha ah. Hoy badeedku isku mid ma wada aha, wey kala duwan yihin, nooc kastana goob gaar ah ayaa laga helaa, sida kuwa barriga aysan isku mid iyo isku meel u wada ahayn, ka soo qaad barriga lama dagaanka ah hoyga ku yaalla iyo barriga qoyan ee biyaha leh ay isku mid u ahayn.

Hoy badeedku wuxuu ku kala yaallaa deegaamada kala duwan ee baddu leedahay, sida deegaan xeebeedka, oo kala ah xeeb careed iyo xeeb dhagaxeed, sidoo kale deegaanka xeebta 2aad (Continental Shelf), deegaanka dhaco halkay baddu moolka ka sii galeyso

ee (Continental Slop) ka, iyo deegaanka badaha guntooda ah (Abyssal Plain), deegaamadaas aan soo sheegay mid walba waxuu leeyahay hoy badeed gaar u ah oo nooc ama koox noole gaar ah ay dagan yihiin. Hoy badeedka ugu caansan waxaa ka mid ah, Mangrove habitat, Reefs habitat, Seaweeds habitat, Sandbanks habitat, Mudflats & Sandflats habitats, Coastal lagoons habitat, submarine structures habitat, submerged sea caves habitat, seagrase habitat.

Waxaan hoos si kooban ugu hadli doonaa mid ka mid ah hooy baddeed yada aan kor ku soo sheegay.

## **Hooyga (Habitat) Maangaroofka.**



(Keeyn Maangaroofka ah)

“Mangrove” waa geed ka baxo xeebaha dhul-baraha dhaca (Tropical)ka, waa geed ka mid ah geedaha ugu mucjisada badan ee dunida, waa geed xididadiisa ay kor u jeedaan oo aysan dhulka ku duugneen sida geedaha kale, waa geed u adkaysan kara cusbada iyo duruufta adag kana bixi kara meel uu geed kale ka bixi karin, intaa waxaa u dheer wuxuu leeyahay geedka Maangarofka faa’iidooyin

aad iyo aad u badan waxaa iskugu yimaado geedkan noocya badan oo noolaha badaha ah (Diverse Species) sida naasleeyda (Mammals), qolofleyda (Crustacean), iyo noocya kale oo kaluunka ah, sidoo kale Shimbiraha Maxaliga ah iyo kuwa haajira, wuxuu noolahaas oo dhan u yahay geedka Maangarofka hoy iyo quud. (1)

Maangarofka waa geed marti qaad aad u fiican leh, wanaaga geedkan kuma simana noolaha badaha kaliya ee sidoo kale wuxuu faa'iido u leeyahay noolaha barriga, dadka xeebaha dago waxay daaqsiiyaan xoolahooda caleenta geedka mangroveka, waxayna laamaha geedkan ku dhistaan aqalada, sidoo kale dabna way ka shitaan.

Geedka Maangarofka mucjisadiisa waxaa ka mid ah, waxuu ilaalshaa tayada biyaha wuxuuna yareeyaa wasakhda daadadka biyaha (Run off)ka ee badaha ku soo qubma, wuxuu sidoo kale sifeeyaa ama shaqshaqaa walxaha biyaha dul- sabeeya (Suspended Material)ka, wuxuuna furfuraa walxaha nafaqada ah (Dissolved Nutrients)ka ee biyaha ku qasan. Maangarofka waa geed sal u ah haramka cunnada (Food Chain) iyo wareega cunnada (Food Cycle).

Noocyada (Species)ka geedka Mangaroofka waxaa ka mid ah:-

- Avicenna Marina
- Rhizophora Mucronata
- Bruguiera Ymnorhiza
- Xylocarpus Granatum
- Criops Tagal
- Lumnitzera Racemosa

Geedkan aadka u qiimaha badan dalkeena Soomaaliya gooba ka mid ah ayuu ka baxaa, sida Jasiirada Sacaaduddiin oo 6Mayl u jirta magaalada Seylac ee G/Awdal, iyo sidoo kale xeebaha G/Bari gaar ahaan R.Caluula iyo R.xaafuun gooba ka tirsan, iyo sidoo kale G/Jubada hoose gaar ahaan xeebaha dhaca Magaalada Kismaayo iyo Jasiiradaha ka ak dhaw Kismaayo. (1)

Maangoroofka faa'iida diisa hoy ahaaneed iyo tan uu badda u leeyahay waxaa sii dheer, faa'iidooyinka dhaqaale oo soo galin karo dalka waa hadi laga faa'ideeysto oo la dhowro, hasa yeeshee nasiib daro geedkan waxaa baabi'in xad dhaaf ah ku hayo dadka, taasoo keentay in uu geedkan ku dhaw yahay dabar go' si guud Caalamka si gaar ahaaneed dalkeena oo ayna jirin cid ama jiha isku xil-saartay inay geedkan qiimaha badan dhowraan.

**Tixraac:**


**(1)** European Union "Marine Habitat types definitions.

(2) Mangrove.org

(3) HCB (Tobogaraafiyada xeebaha dalka).

Soomaaliya waxay ku taalaa geeska Afrika Waana meel aad muhiim ugu ah xagga juqraafiga. Bedka dhulka Soomaaliya uu ku fadhiyaa qiyaastii waa 637,000 Kiiloomitir labajibbaaran. Soomaaliya waxaa waqooyi ka xiga Gacanka Cadan, barigana Badweynta Hindiya, dhanka Galbeedna Ethiopia, xaga koofurneh Kenya, waqooyi-galbeedna Djabouti.

Soomaaliya waxay leedahay xeebta ugu dheer Afrika, taas oo dhererkeedu yahay qiyaastii [3,025 Km].

Dhulka Soomaaliya waa dhul saxara xigeen ah. Waana dhul siman, marka laga reebo dooxooyinka, webiyada: Shabeelle iyo Jubba iyo buuraleyda Golis ee taxan xeebaha Waqooyi iyo Waqooyi-Bari. Taasi waxay sahal kadhigeysaa in reer guuraagu ay si sahal ah u safri karaan meeshii ay doonaan. Soomaaliya waa dhul aad ugu haboon xoola dhaqashada, gaar ahaan xilliga barwaaqada, iyadoo ay ka baxdo dhir aad u kala gedisan.

Dhanka waqooyiga dalka ee ku xeeran gacanka Cadan waxaa ku yaala dhulka loo yaqaana Guban, dhulkaas oo bilicsami ku siyaadinaya Berbera iyo buuraha Golis ee aan kor ku soo xusnay. Ceerigaabo agteedana waxaa ku yaal buurta ugu dheer Soomaaliya oo lagu magacaabo Surad, dhererkeeduna waxaa lagu qiyaasay 7,900 feet ama (2595 mitir). Buurta labaad ee Soomaaliya ugu dheerna waa buurta Baxaya, waxayna kutaal Buruc oo Boosaaso ka xigta dhanka Bari.

Sidaanu ognahay labada marin biyood ee Badda cas iyo Gacanka Cadan waxaa deggan dowlada badan oo ay ka mid yahiin Soomaaliya, Yemen, Djabuuti, Eratariya, Sacuudi Carabiya,

Suudaan, Masar, iyo Urdun, waddanba waddanka uu waqooyi ka sii xiga waa ka kululyahay waayo cimila ahaan ayaa ah in koofurta Badda cas ay ka qabowdahay waqooyigeeda sababtoo ah waqooyiga ayaa cusbo badan, biyaha waqooyiga waa kuwa cariiri oo uumi (Humidity) badan gaar ahaan waqtiga guga iyo xagaaga oo qorraxdu jirto waqooyi, sida aanu kasoo xiganay hay'ad goboleedka ilaalisa deegaanka Badda cas iyo Gacanka Cadan ee loo yaqaan marka magaceeda la soo gaabiyo (PERSGA), sidaasi darteed Soomaaliya waxay soo galaysaa wadamada ugu cimilada qabow marka laga hadlayo wadamada ku teedsan Badda cas iyo Gacanka Cadan.

Si guud ahaaneed hadaanu uga hadalno duruufaha cimiladaasi waa sidatan:

## 1-Heer kulka Xeebta:

Way ka duwan yahiin heerkulka meelaha u dhow xeebta Badda Cas iyo Gacanka Cadan marka loo eegayo kala duwanaanshaha meelaha xeebaha badda ka fog iyadoo heerkulka xeebuhu u dhaxeeyo (30-40c) xiliga xagaaga ah iyo (22-28c) xiliga jiilaalka, halka meelaha buuralayda ahna uu heer kulkeedu u dhaxeeyo (8-20c) xiliga xagaaga ah iyo (0-15c) xiliga jiilaalka.

## 2-Cadaadiska Hawada:

Xeebta waqooyi waxaa saameeya cadaadiska sare ee Aasiya iyo Yurub iyo cadaadiska hoose ee Afrika, sido kale xiliga xagaaga waxaa saameeya cadaadiska hoose ee Badda dhexe iyo kan sare ee Afrika iyo badwaynta Baasifika.

## 3-Dabaysha iyo Roobka:

Kala duwanaanshaha heer kulka iyo cadaadiska hawada waxey u horseedeen mandiqada is badal

xiliyeed oo ku dhacay jihada dabaysha ee mandiqada marka laga reebo qeeybta waqooyi ee Badda Cas halkaas oo ka dhacayso dabaylahan soo socdo:

* Dabayl ka timaado waqooyi Bari, waana dabayl dhacda Oct-March, waa waqtiga dayrta ah.

* Dabayl ka timaado koofur galbeed waana dabayl ku dhacda gobolka April-Sep xilliga Gu'a iyo xagaaga roobkeeduna waxu ka da'aa koofur galbeed ee qeeybta Bari ee Badda Cas iyo gacanka cadan iyo dalka intiisa kale

* Dabayl Bari oo ku dhacda Gacanka Cadan iyo dabayl koofur bariyeed oo ku dhacda marin biyoodka Baab al-Mandab iyo koofurta Badda Cas, waana dabayl dhacda xiliga Jiilaalka laga bilaabo December ilaa April.

**4-Dhaqaaqa Biyaha:**

Duruufaha cimilada (Heer Kulka, cadaadiska hawada iyo dabaysha) waxey saameeyaan dhaqaaqa biyaha, waxaana loo kala qaybiyaa seddax qaybood oo kala ah:

**A**- Qulqul Sare

B- Qulqul Hoose

T- Soo bixitaanka biyaha iyo noqoshadooda-المد والجزر-Tides.

**Tixraac:**


1.http://somalitalk.com/somalia/beauty/dhulka/index.html

2-PERSGA

# XIRIIRKA KA DHAXEEYA KALLUUNKA IYO COWS BADEEDKA

Badda waxaa ku nool kumanaan noole oo u badan kuwa iyaga isku dul nool iyo kuwa cuna cows badeedka loo yaqaan (Phytoplankton). Kalluunka ku nool badaha waxaa loo qeybiyaa laba Nooc oo kala ah:-

1. Pelagic fish
2. Dimersal fish

Nooc ku nool cowska badda, waxaana la yiraahdaa Pelagic fish: Kalluunkan qaarkiis waxaa uu cunaa kalluunka kale maadama uu ku nool yahay cowska ayuu hadana waxaa uu isticmaalaa mararka qaarkood inuu cuno kalluunka kale, balse ma ahan dhamaantood keliya waa qaar kamid ah.

Nooca kale waxaa la yiraahdaa (Dimersal fish) waana Kalluunka ku nool gunta hoose ee badda iyo dhexda badda, noocan waxa uu cunaa kalluunka kale wuxuuna isu cunaa sida uu isaga xoog badan yahay ama isaga weyn yahay sida ay soo ogaatay Hay'adda Cilmibaarista Badaha Soomaaliyeed daraasad ay ku sameysay xeebaha waxaa lagu soo ogaaday in uu Kalluunka guur guuro sida xoolaha oo kale walibana qoys qoys (halkii mar waxaad arkeysaa indhahaagu in ay qabtaan malaayiin kalluun ah oo hal nooc ama hal magac leh), guur guurkan ayaa mar waliba sababa in ay keento dhowr arimood oo ay ugu waa weyn yihiin:-

1- Deegaanka ay ku nool yihiin oo ku bata qalabka Jilaabashada, taasina waxa ay keentaa in kalluunka uu u haajiro baddo kale oo uu ku heli karo amaan isla markaana uu ka heli karo cowska uu ku nool yahay.
2- Deegaanka badda uu kaga sugan yahay oo ka nabaad guura cowska noloshiisa ku xeran tahay ayna sababto inuu isaga tago halkaas.
3- Arinta kale waxaa keenta hadii kalluunka deeganka uu ku nool yahay lagu shubo sun wax yeeleysa nolosha kalluunka iyo cowska ay nolol ahaan u cunaan haddii aan la dhowrinna waxaa imaan kara Baaba' iyo Dabar goyn.

Xiriirka ugu weyn ee ka dhaxeya Kalluunka iyo Cows baddeedka waxa uu yahay Kalluunka ku nool cowska ma noolaan karo cowska la'aantiisa, maxaa yeelay noloshiisa ayaa Ilaahey ka dhigay in uu ku noolaado cowska haddii uu wayana dhammaan noocaan waxaa ku yimaada dhimasho, sidaasna waxaa isugu xiran cowska iyo kalluunka, kalluunka markii uu daaqo cows badeedka, waxaa bata korniinka cowska taasina waa mid Ilaahey ugu tala galay, dhinaca kale kalluunka cuna kalluunka kale sida aan hore u soo xusnay waxaa uu u guur guuraa qoys qoys miisaan ahaanna

way kale weyn yihiin sidaas ay tahayna ay isku Ugaarsadaan.

Xirriirka guud ee ka dhaxeya Kalluunka iyo Cowska waa mid aad u weyn kuna tiirsan tahay nolosha kalluunka.

Badaha waxaa laga helaa malaayiin kale duwan oo kalluun ah, dhamaantoodna waxaa ka dhaxeya xiriir nololeed, kalluunka hilibka cuna iyo kalluunka cowska cuna.

Cowsku waa cows qalalan lehna caleen haruud ah, caleemahaas oo kala bax baxa, wuxuuna ka dhashaa gunta hoose ee badda waxaana uu kaallin weyn ka qaataa isku dul noolaansha kalluunka iyo cowska; waa ay ku hoydaan, cunaan, kuna dhalaan (EcoSystem).

Faa'iidada kale ee uu leeyahay cows baddeedku waxaa ka dhasha caleesha badda (Sea-Shells) oo si wanaagsan ay qiimo wayn ugu leedahay bini aadamka, waxaa lagu qurxiyaa guryaha iyo meelaha leyskugu yimaado hadana caleesha qaarkeed waxaa ku dhex jira (Luul Diamond) waxaa kale oo laga dhex helaa (Sea Worms) waxayna ay dhexgalan bacoosha dhexdeeda si ay hoy uga dhigtaan markii uu weynado Worms kan bocooshana waa ay weynataa, asalkeda bacoosha waxay ka dhalata cows badeedka deriska la ah Jamalada.

Cows badeedka wax tarka uu u leyahay noolaha badda aad ayuu u fara badan yahay, tusaale cowska Taliga waxa uu soo baxa xiliga Jiilaalka, waxana uu ka mid yahay cowska badda waxaana uu yimaada xeebaha oo dhan, maxaa yeelay badda markii ay aad u caariso waxaa dibada uso baxa Jamalada iyo cowska badda, waxaana cowska ku dhacda qoraxda, markii ay qoraxda ku dhacdana Taliga waa uu qalalaa, cowskana ma awoodo in uu iska difaaco mawjadaha badda, sidaas ayuna cowska ku so go'aa kuna yimaada xeebaha.

Markii hore oo uu soo go'ayey cowska wuxuu ahaa cagaar markii ay qoraxda ku dhacdana wuxuu noqdaa midab buni ama gaduud loo maleeyo, waxaa uu noqdaa markan Tali ama cows an waxba tarin. Si kastaba xariir ayaa ka dhaxeeya Kalluunka iyo Cows Badeedka.

Kalluunka kama maarmo cows badeedka, cows badeedkana kama maarmo kalluunka, sidaas ayay labadaba iskugu xiran yihiin. markii uu bato bixista cows badeedka waxaa bata kalluunka cowska daaqa taranka kalluunkana waxaa uu keenaa inuu dego deegaanka ay badda kaga sugan yihiin kalluunka.

Isbadalka Jawiga Badda (Winds, Lights, Currents, Moisturo) iyo dabaylaha shucaaca leh waxaa ka dhashta cows badeedyo kala duwan oo manaafacaad u leh

kalluunka cowska daaqa oo uu cunta ahaan u cunno, kalluunka qaarkiis waxaad arkeysaa inay ku midib yihiin cows badeedka, cows badeedka uma halaabo si deg deg ah sida cowska ka baxa barriga kaliya wuxuu midabkiisa is badalaa markii uu soo caariyo xiliga ay badda jawigeeda ay kacsan tahay isla markaasna ay qoraxda ku dhacdo, dadka reer maanyaha ah markaas waxa ay fahmaan in badda gudaheedu ay ka socdaan mowjado culus laguna garto cowskan loogu magac daray Taliga ee soo go'go'ay, ma ahan cowska Taliga kaliyee mararka qaar waxaad arkeysaa cows qurux badan oo ku soo caariyey xeebaha dhow dhow.

***W/D. Eng. Cabaas Nuur Mahdi***
***Waaxda Culluunta Badda***



# Halista Sunta lagu duugay Xeebaha Dalka Soomaaliya

*W.Q: Abdirahim Warsame Dirie*



Jaziiradda Kiyaanbooni 2005.

kadib burburkii Dowladii dhexe ee Soomaaliya, waxay noqotey xeebaha Soomaaliya mid ay usoo kala ordaan, shirkadaha dhoofiya sunta iyo haraadiga warshadaha kiimikada iyo hubka nukleerka ahba, duugidda suntaas oo soo bilaabatey 1991 marki ay meesha kabaxdey dowladdii dhexe, suntaas halisteeda waxaa la ogaadey iyo waxyaabaha ay u geysatey shacabka Soomaaliyeed markii ay dhacdey musiibaddii bad gariirka 2004 dhacdey ee Asia, taasoo banaanka usoo saartey suntii lagu aasey xeebta dheer ee Soomaaliya, cilmi Baarayaal iyo hay,ado kashaqeeya arimahaas waxay sheegeen in ay halis galin karto suntaas dad aad u fara badan oo ku dhaqan xeebaha Soomaaliya, iyo waliba

deegaanada ku dhow dhow xeebahaas.

Warbixin ay soo saartay Qaramada Midoobey ayaa shaaca ka qaaday halista sunta lagu aasay xeebaha iyo badda Soomaaliya. Halistaas oo Soomaalida heysay ilaa markii uu dagaalka ahliga ahi ka bilowday dalka.

Klaus Toepfer oo ah agaasime sare oo ka tirsan UNEP iyo Rachmad Witoelar oo ah Wasiirka Indonesia u qaabilsan deegaanka oo ka hadlayey xarunta

UNEP ee Nairobi, February 22, 2005. Ayaa latilmaamay arinkaas.

Warbixinta Qaramada midoobey waxa ay sheegtay in badgariirkii uu sababay suntii ku duugnayd badaha Soomaaliya in dabooladii ka qaadameen ama haamihii ay ku jireen baddu soo tuurtay kuwaas oo halis gelisay caafimaadka Soomaalida.

Warbixinta waxaa kaloo ay sheegtay badgariirka soo gaartay xeebaha Soomaaliya in ay firdhisay sunta Nukliyeerka iyo waxyaabaha halista ah oo ku duugnaa xeebaha Soomaaliya. Taasoo dhalisay khatar caafimaad oo aad u baaxad weyn oo soo food saartay shacabka Soomaaliyeed.

Warbixinta UNEP ayaa VOA u sheegtay in 15-kii sano ee la soo dhaafay ay shirkado reer Yurub ah iyo kuwo kaleba ay Soomaaliya u isticmaali jireen goobta lagu duugo sunta nooca loo yaqaan nukliyeer "nuclear" iyo qashinka loo yaqaan "Hazardous Wastes".

Warbixinta UNEP waxaa kaloo jira in halkaas kujiro sunta shucaaca ah ee Uranium, sunta maduulka ah ee leads, sunta biraha ay kamid yihiin cadmium & mercury, qashinka wershedaha, qashinka cisbitaalada, qashinka kimikada.

Raadka ay suntaasi ku yeelatay bulshada deggan xeebaha Soomaaliya waa arin masiibo ah Afhayeen Qaraamada midoobey u qaabilsan Degaanka, ayaa sheegay dhibaatooyinka ay dadkaasi la kulmeen ay tahay "cuduro halis ah oo qalajinaya sambabada, qufac aad u xoogan, afka oo dhiig ka soo baxayo, dhiig ku furmaaya gudaha caloosha, maqaarka oo diidaya kimiko aan la aqoon" ayuu yiri, asagoo ku daray "Waxaa jira cuduro badan oo laga soo sheegayo tuulooyin kuwaas oo ah inta aan fursada u helay in aan eego. Laakiin waa in baaritaan dheer arinta lagu sameeyo si loo ogaado baaxada dhibaatadan".




Haamo Waaweyn oo kusoo Caariyey Xeebaha Gobolka Jubbada Hoose 2005, 2006

Aafadii badgariirku waxa ay bisihii December ee sannadkii tegey ka dhacday meelo badan oo badweynta Hindiya ay Soomaaliya kamid tahay. Mowjadahaas soo gaarey Soomaaliya ayaa lagu soo waraamay in ay badda ka soo saareen dabooladii ka jejebiyeen waxyaabihii lagu soo qaaday sunta lagu duugey xeebha Soomaaliya.




Socdaal gaaban oo ay qaar ka mid ah mas'uuliyiintii lugu magacaabi jirey Isbahaysiga Dooxada Jubba ay ku tageen jasiiradaha gobolka Jubbada Hoose ayaa waxa ay ku soo xaqiijiyeen in ay jasiiradahaas qaarkood yaalaan haamo waaweyn oo aan lagaranayn oo looga shakiyay in ay ku jiraan sun.

Kaluumaysato Ku Noolaa Jasiirado Ka Mid ah J/Hoose oo aagaasi isaga huleelay kadib markii ay ku dhaceen cuduro la garan waayey oo ka asiibay maqaarka.

Waxaa kaloo socdaal ku tagay Jaziiradaha hay'addo iyo ganacsato, ayadoo sababta socdaalkooda lagu macneeyey kadib markii qaylo dhaan xoogan ay ka timid dadyowga dagan Jasiiradaha gobolkaan oo kasoo qayliyey haamo waaweyn oo ay sheegeen in ay badda soo caariday ayna soo dhawaanayaan.

Haamahaan la sheegay in ay soo caariday badda ayaa waxaa ay ku macneeyeen dadka in ay ku jirto sunta ay maraakiibta shisheeyey ku soo shubaan xeebaha Soomaaliya, ayadoo hadda haamahaan ay yaalaan xeebaha u dhow Jasiiradaha Kooyaamo iyo

Kambooni oo labaduba ka mid ah jasiiraha gobolkan.

Waxaa kaloo ay tageen Koyaamo oo ayadu ay taalo haan weyn oo 1 km u jirta xeebta jasiirada koyaamo qiyaastiina biyaha badda ka saraysa in lagu qiyaasay 27 feet, haantaasi oo aad u weyn ayaana ilaa iyo iminka la garanayen waxa ku jira balse ay soo dhawaatay kadib markii ay dhaceen bad gariirkii tsunami, mana aysan jirin cid si toos ah oga war bixisay maadaama ay kaluumaysatadii aagaasi ku noolayd ay ka baxaan kadib markii ay ku dhaceen cuduro la garan waayey oo ka asiibay maqaarka.

Sidoo kale waxa ay booqdeen Jasiirada Kiyaanbooni oo ayadana ay taalo haan weyn oo ka soo caariday badda oo ka mid ah haamaha ay keeneen maraakiibta shisheeye oo qashinka ku soo daadiya Xeebaha Soomaaliya.

Waxaa kaloo ay la kulmeen dad kaluumaysato ah oo u sheegay in ay soo badanayaan caarinta ay badda ka soo caariyayaan xayawaanka ku dhexnool taasna ay sababtay wasakhda lagu soo daadshay badda.

Taariikdu markay ahyad 16/03/05, waxaa isbitalka weyn ee magalada kismaayo la keenay 2 qof oo dhaawac ah, halka mid kelena uu geeriyoodey waxaana lasheegay inay kusugnaayeen sedexdan qof jasiiradda buur-gaabo ee gobalka jubada hoose waxaana loo aaneeyey iney kusumoobeen suntan lagu soo daadiyey xeebaha gobalka, dadkan waxyeelada soo gaartey ayaa ahaa dad xirfadleey kalluumeysato ahaa waxay kaloo ahaayeen quusayaal badda quusa.

## Kormeer ay Hay'adda CilmiBaarist Badaha Soomaaliyeed ay xeebaha Muqdisho kasameysay.

Hay'adda CilmiBaarista Badaha Soomaaliyeed ayaa kormeer shaqo iyo cilmi baaris kasameysay deegaan xeebeedka caasimadda Muqdisho, cilmibaarista lasameeyey waxaa lagu soo arkey dhanka xeebta koonfureed ee caasimadda Haan weyn oo kujirta laba dhagax oo waaweyn dhexdooda, haantaas waxay kasoo caaridey dhanka Badda.

Haantaas sunta ah waxay hay'adda qeylo dhaan ka kaysay xafiisyada ugu sareeya ee Dowladda fedraalka ah, waxaa kaloo ay hay,adda ay qabatey shirar waaweyn oo ay kusoo bandhigtay haantaas sunta ah iyo halista ay u leedahay bulshada kudhaqan deegaanka, ilaa hadda cid wax ka qabatey haantaas majirto oo usoo kacdey balse hay'adda waxay u gudbisey hay'ado caalami ah oo awoodi kara xakameynta suntaas oo halis ku ah bulshadeena Soomaaliyeed, mana joojin doonto hay'adda waxka qabashada Haantaas iyo gaarsiinta cid walba oo awoodi karta wax ka qabashadeeda.





HCBS kormeer ay ku sameysay xeebaha koofureed ee caasimadda aya so aragtay HAAN WEYN oo ku jirta laba dhagax dhexdooda sida ka muqata sawirka.

## Qawaaniinta iyo Heshiisyada Caalamka Ee Ilaalinta Deegaanka.

waxaa xusid mudan in dunida ay ka jiraan qawaaniin caalami ah iyo heshiisiyo loogu talagalay inay xakameeyaan ka manaafacaadsiga

ama ka ganacsiga qashinka iyo sunta halistaa ee warshadaha, safrinteeda (Transportation) markay xudduudaha u kala gooshayso, kaydinteeda, iwm.

Waxaa ka mid ah qawaaniintaas axdigii Basel ee ay 1987-kii ku kala saxiixdeen 116 waddan (Basel Convention on the Control of Transboundary Movements of Hazardous Wastes and Their Disposal). Heshiiskaas oo markii hore ka koobnaa 29 qodb iyo lix lifaaq (haddana noqday sagaal lifaaq) ayaa waxaa (November, 2000) saxiixay 141 waddan. Soomaaliya kuma jirto ilaa hadda waddamadaas. Sidoo kale hay'adda Qaramada Midoobay u qaabilsan arrimaha degaanka (UNEP) ayaa iyana qaadatay waxa loo yaqaan baaqii ama qaraarkii Qaahira oo ku taxaluqay islamarkaana tilmaamo cilmiyayasan ka bixiyey sida ugu habboon marka laga fiiriyo xagga dhibaatada deegaanka ku iman karta ee loo hanan karo ama loo maarayn karo, loo kala-shaandhayn karo ama loo xafidin karo qashinkaas halistaa iyo dhibka ka iman kara ka dheefsigiisa (Cairo Guidelines and Principles for Environmentally Sound Management of Hazardous Wastes). Waxyaalaha Qaynuunka Qahira jiheeyay ayaa waxaa ka mid ah, tusaale ahaan, in haddiiba ay dhacdo in laba waddan ku heshiiyaan inay kala-gataan qashinkaas ay tahay waajib saaran kan dhoofinaya qashinku inuu hubiyo (technically) in halka qashinku ku dambayn doono ay tahay meel ku habboon oo khatarta ka imankarta ay tahay mid aad u yar marka laga hubiyo dhinacyo badan.

1989-kii ayaa golaha loo dhanyahay ee Qaramada Midoobay kal-fadhigiisii 44-aad wuxuu ku guddoonsaday qaraarkii tirsigiisu ahaa 44/226 oo isaguna looga jeeday xakamaynta dhibka qashinkaasi dhoofintiisu keeno.

Axdiyadii UNCLOS (United Nations Convention on the Law of the Sea) iyo LONDON DUMPING CONEVENTION (1989) ayaa iyagana ujeeddadoodu ahayd in laga hortago in dhib loo geysto degaanka dabiiciga ah ee badaha adduunka gaar ahaan biyaha caalamiga ah. Heshiiska London wuxuu si gaara u khuseeyaa sidii badaha loga bedbaadin lahaa sunta iyo qashinka haraaga nukliyeerka.

Waxaa kaloo jira axdiyo kale oo heer gobol ah sida Axdigii (Bamako) midkii Midowga Afrika uu ku mamnuucay oo xubnihiisa kaga xarrimay la soo degidda iyo ka ganacsiga qashinka halista ah. Bamako Convention wuxuu isna si gaara u tixgalinayaa daryeelka badaha wuxuuna asalkiisaba ka dhashay markii Afrika aragtay inaanay ku fillayn qawaaniinta caalamiga ah oo heer qaaradeedna loo baahanyahay in degaanka la daryeelo.

Lasaco qoraalada soo socda …

Xigasho:-


1. United nation envarmentel program (UNEP) Nairobi, February 22, 2005.
2. Somalitalk.com (daabacaad) December 10, 2000.
3. Voasomali.com (warbixin) February 24, 2005.
4. Basel convention 1987, November 2000.
5. Cairo guidelines and princples for Environmetally sound management of hazardous wastes 31may, 1982.
6. Unclos 1982, and London Duming conevention 1989.
7. Bamako, Ban of the Important into Africa and the control of Transboudary movement and management of hazardous wastes within Africa 1994.
8. Nairobi conevention Eastern coastal Enviromental 1985.

# Dhibaatada BACDA ay ku keento Deegaanka "Bay'adda

**W/D: Mustafe Hassan Nour**

Burburkii dawladdii dhexe ee SoomAaliya wuxuu meesha ka saaray nidaamkii iyo xasiloonidii ay dadka Soomaaliyeed ku naalloon jireen. Waxaa gabi ahaan meesha ka baxay adeegyadii hay'adaha qaranku ay bulshada u haayeen sida adeegga waaxyaha nadaafadda iyo bilicda ee Dawladaha hoose ee ka hawl gali jiray dhammaan magaaloyinka dalka. Shaqaalaha dawladaha hoose ayaa ahaa kuwii gaarka ka hayay nadaafadda iyo bilicda magaalooyinka dalka iyagoo tallaabo sharci ah ka qaadi jirtay cid kasta oo tacaddi u gaysata nidaamka guud ee nadaafadda. Mudada uu dalku ku jiray jaha-wareerka siyaasadeed, waxaa adduunka ku soo batay warshadaha sameeya bacaha lagu adeegto "plastic bags" iyo kuwo kale oo badan oo siyaaba kala duwan loo isticmaalo.

Dalalka sancada iyo sayniska ku hormaray, ayaa goor aad u habboon ku baraarugay raad xumida ay leedahay isticmaalka bacda, waxay bilaabeen wacyi gelin guud oo ay dadwaynahooda ku tusaalaynaayaan dhibaatada dadka, duunyada iyo degaanka ay ku keeni karto isticmaalka bacaha. Waxay bilaabeen ololе ama hawl-gallo dib loogu aruurinaayo bacda, dibna loogu dhiiri gelinaayo farsmada gacanta iyo tan warshadaha si loo helo boorso gacmeedya yaryar oo u dhigma kuwa bacda. Waxaa sidaa looga hortagayaa dhibaatada ka imaan karta

daadsanaanta bacda. Shirkadaha iyo kambaniyada ganacsiga ayaa lagu tartarsiiyaa hadba sida ay gacan uga gaystaan dhimidda isticmaalka bacda iyagoo iyaguna abaal marinno siiya macaamishooda hoos u dhiga isticmaalka bacda. In kasta oo ay Soomaalidu dadaallo ka gaysatay dib u soo celinta dawladnimada, haddana suura-gal uma ahayn in ay la soo noqdaan dhammaan wixii burburay sida ay u dhan yihiin sida ilaalinta caafimaad bulshada, duunyada iyo degaanka/bay’ada.

Waxaa harqiyay magaalooyinka Soomaaliyeed muuqaallo fool xun oo nadaafad xumi ah, kuwaa oo ay sababtay ku adeegashada bacda iyada oo aan loo meel dayinna ay dadku ku tuuraan hadba meeshii ka hortimaada markay bacda ka gaaraan dantooda. Bacda ayaa la arkaa iyadoo si qaab darro ah u daadsan meelihii dadka u dhaxeeyay, waxaa la arkaa iyadoo ka raaracda geedaha dushooda, daadsan jiriddooda, sidaana waxaa meesha ka baxa muuqaalkii qurxoonaa ee dhirta iyo geeduhu u la haayeen magaalada. Khubarada caafimaadka bay’adda ayaa xaqiijiyay in maadada bacda laga sameeyo aysan si dhaqsi u baabin.

Baahidda bacda waxaa kaalin ka qaata qiima jabanaanteeda iyo fudeydkeeda hadday noqon lahayd in debedda dalka laga soo dajiyo amaba gudaha dalka lagu sameeyo. Waxaa la xaqiijiyay in isticmaalka bacaha guud ahaan adduunka uu gaarayo qiyaastii 500,000,000,000 (Shan boqol oo bilyan baco) sanad kasta, waxaana la adeegsadaa daqiiqad walba in

ka badan 1,000,000 (hal milyan) [1]

Bacda ayaa hormuud u ah aafooyinka sida ba'an u halakey degaanada barriga, biyaha "Badda". Bacdu waxay ka hor joogsata dhirta iyo noolaha kale ee ku kala nool degaanada kala duwan inay helaan hawo iyo qoraxba. Waxaa khatarta sii qoto dheereeya in aysan bacda si fudud u baa'bin, joogina karto sanado badan. Waxaa la caddeeyay in cimriga bacdu gaari karo ilaa 1000 (kun sano), sababtuna waxay tahay iyadoo ka samaysan tahay waxa loo yaqaan "molakuyuullo" aad u waaweyn oo aanay bakteeriyadu bur-burin karin. In kasta oo ay jiraan dadaallo iyo ku tala-gallo wax looga qabanaayo awoodda adkaysiga maadada ay bacdu ka samaysan tahay si bakteeriyadu u burburso. Waxaa la sheegay in 1950 uu ahaa markii uu adduunku bilaabay samaynta iyo ku-adeegashada bacda.[2], Wixii xilligaa ka dambeeyey bacahu waxay noqdeen mid xoog looga isticmaalo aduunka, ku adeegashadeeda fudud awgeed.

Wadamada adduunka qaar ayaa qaaday tallaabo dhiiran oo ay ku mamnuuceen samaynta iyo ku adeegsiga bacda, qaarna waxay ku soo rogeen cashuur badan si looga waantoobo samaynta bacda iyo ku adeegashadeeda. Haddaba Maamulada Somaliyeed sida Somaliland iyo Puntland ayaa tallaabooyin isa soo tarayay qaaday sanadkii 2013 iyo sanadkan 2015, labada maamul ayaa soo rogay go'aanno wax ku ool ah oo lagu dhimayo samaynta, soo dejinta, ka ganacsiga iyo guud

([1]) Available here: (http://dpw.lacounty.gov/epd/PlasticBags/Articles/Googobits_07-21-05.pdf

([2]) Available here: http://www.bbc.co.uk/somali/news/story/2004/08/printable/040824_baco.shtml)

ahaan ku-adeegashada bacda si looga hortago khatar jirta iyo mid dalka ku soo fool leh. Ku dhaqanka iyo fulinta go'aanadaa ayuu maamulka Somaliland u qabatay 120 maalmood. [3]

## DHIBAATADA BACDA U GAYSATO DEGAANKA BARIGA

Khataraha bacda ay ku keento degaanka barriga ayaa aad u badan, ayadoo ay sidaa tahay ayaana ku koobnay sidan:

1. Waddooyinka iyo suuqyada
2. Garoomada iyo dhulka bannaan ee ay caruurta ku ciyaarto
3. Goobaha waxbarashada
4. Kaymaha iyo goobaha dalxiiska
5. Daaqa xoolaha iyo harooyinka biyaha
6. Dhirta iyo dhul beereedka magaalooyinka saaran
7. Xoolaha nool



An animal in searching food through plastic bags

Bacda waxay faafisaa cudurada, gaar ahaan marka lagu gubo bacda meel aan habbooneen, sida guryaha gudahooda (Incinerating plastic bags un suitable place). Qiiqa bacda oo sun ah awgiis ayaa sababa caafimaad darro ku keena guud ahaan bulshada gaar ahaan caruurta iyo haweenka. Suntan ayaa sababta in uu xanuun ku yimaada qafka, ayadoo qaaca bacda uu keeno in uu dhaawacmo hab-mareenka neef-siga qofka (respiratory system). Sidoo kale, bacda waxay wasakhaysaa hawada

(3). Available: (http://www.somaliland.org/2015/04/14/madaxweynaha-somaliland-oo-ka-mamnuucay-dalka-isticmaalka-bacaha/)

loo yaqaan oxygen ka ee uu nooluhu ku neef-sado.

**Dhibaatada bacdu ku keento deegaanka badda iyo xeebteeda**

Waxaa mudan in la xuso, waxa ugu badan ee badda/badaha wasakheeya in ay ka yimaadaan dhulka berriga ah 8o% "boqolkiiba siddetan". Qashinka bacda ayaa noqda kan ugu baaxadda wayn oo dhibaata muuqata ku haya degaanka badda iyo noolaha ku nool biyaha badda gudahooda.

Bacaha ayaa gaara deegaanka xeebta iyo gudaha badda qaabab kala duwan:

a. In si aan ku tala gal ahayn loogu shubo agagaarka xeebta badda, qashin ay bacdu qayb wayn ka tahay, sidaana ay bacdu ku gaaro gudaha badda.
b. In si ku tala gal ah loogu shubo bacda badda iyo in meel ku dhaw laga sameeyo meelo qashin qub ah oo aan lahayn xayndaab adag oo si wanaagsan u dhisan.
c. In biyaha "daadadka roobabka" iyo dabaylaha ay bacda iyo wasakhda kale ku shubaan badda.

Arimahaa ayaa keena in uu sumoobo, dhinto, dhaawacmo xayawaanka badda ku nool oo uu ka midka yahay kalluunka, qubada iyo kuwo kale oo badan oo ay ku tiirsan tahay nolosha dadku. Haddaba bacda ayaa sababta dhimasho lagu qiyaasay sanad walba illa 1, 000, 000 "hal-milyan" oo shimbira ah, 100.000.00 "boqol kun" oo naaslayda badda ku nool ooy ka mid tahay Qubadu, sidoo kale waxaan la tirin karayn oo kalluun ah. [4]

---

(4) Available :( http://www.wdcs.org/wdcskids/en/story_details.php?select=879)

Bacdu waxay baa'bisaa deggaanka hoose ee badaha, ka dibna waxay meesha ka baxa raashiinkii ay ku noolaaayeen noolaha baddu. Xayawaanka baddu waxay cunaan bacda iyaga oo moodaaya bacda in ay tahay cunto ama way dabartaa sidaas dhaawac ugu yimaada noolaha badda, ka dibna sababtaa bay u dhintaan. Haddii wadamada adduunka ay la daalaa dhacayaan dhibaatadan iyagoo haysta nidaam bay'adeed oo shaqeeya, waxaa hubaal ah arinku in uu ku adag yahay dalkeenna oo ay adeegyadiisa aysan luga adag ku taagkanyn. Hayeeshee, waxaa dhab ah in sida uu dalku "u il daranyahay uusan u Alla darneyn".



Plastic bags on Hamarwayne beach



Sea turtle eats plastic bags as food

# MAGACYADII LOO AQOONI JIRAY DALKA SOOMAALIYA

W/D: Adm Faarax Axmed Cumar

**Maqaalka Seddexaad:**

Hore waxaan ugu soo xusnay labadii maqaal ee ku soo baxay Juula Jawaay 1 & 2, magacyadahoos ku qoran oo kala ahaa kuwii dalkeenna loo aqooni jiray taariikhaha ku hor xusan iyo dadyawgii u yiqiin, waana sidan:-

1. Punt: Qarnigii 27-4 (23Qarni) C.H. (Asal: Masar)
2. Phunt (Funt): Qar 13-6 (8Qarni) C.H. (Asal: Yahuud)
3. Kuush (Dhulka dadkii madow): 12-5 (8 Qarni) C.H. (Asal: Masar)

F.G: Punt waxaaa loo aqooni jiray dhulka xeebaha Kulaala, halka Kushna loo aqoonni jiray dhulka gudaha ee aan ku dhawayn badaha.

4. Ethiopia: (dhulka dadka madow) Qarnigii 5C.H. – 13CD (18Qarni), (Asal: Girik)
5. Xabashi: (dhulka dadkii madow, ama isku dhafka) Qarnigii (5CH – 13CD) (18Qarni); asal: Xijaas iyo Yemen.

F.G: ABYSINIA: waa magacii Xabashada oo Burtuqiisku si qaldan ugu dhawaaqay Qarnigii 15 CD ilaa manta, wuxuuna khuseeyaa dalka Itoobiya. Sidaas waxaan hore u soo xusnay 5 Magac oo uu dalkeennu lahaa.

**Qormadan 3aad waxaan ku eegaynaa si taxana ah magacyada soo socda:**

**Magaca 6aad: Dalkii MACAAFIR:** Magacaan wuxuu ka soo jeeda dalka Yemen, sida

muuqatana waa magac jiray taariikh hore, hayeeshee, aan waqti badan socon ama aan sidaa u sii fidin. Sida la ogsoo yahay Yemen waa dal taariikh dheer leh oo ay soo xakumeen dawlado ama talisyo kala duwan waana sidan:-

1. Dowladdii MACIIN – ka hor 1500 CH (ku dhowaad)
2. Dowladdii SABA 1500-5 C.H (ku dhowaad)
3. Dowladdii XIMYAR (5C.H – 6 C.D) (ku dhowaad)

Dawladahaa Yemen ka soo arimiyay iyo dadka reer Yemenba, waxay xiriir la lahaayeen magaalooyinka Somaliyeed ee dhaca xeebaha woqooyi Bari iyo woqooyi galbeed. Taariikh yahanada waxay xaqiijiyeen in dowladaha Yemen ka taliyay ay ahaayeen kuwii asaasay camirayna magaalooyinka taarrikhda dheer leh ee dhaca xeebaha dalkeenna sida: Saylac, Barbara, Bandar-Qaasim (Boosaaso), Xamar (Muqdishu), Marka, Baraawe iyo Kismaayo. Waxaa sugan in magaalooyinkaa Somaliyeed iyo kuwo kale oo dhaca bariga, bartamaha iyo koofurta Africa looga arimin jiri muddo dheer xagga dalka Yemen iyagoo gaaray ilaa iyo xeebaha dalka Mozinbiik. (1) (Pilliny taariikh yahankii Romanka Qarnigii koowaad ee CD wuxuu qorey warkaan:-

Boqortooyinkii Yemen ayaa aqoon u lahaa xeebaha bariga Afrika, in badan oo ka tirsanna gacanta ku hayay oo maamulay. Waxay gacanta ku hayeen guud ahaan dhaqdhaqaaqa ganacsi ee mara xeebta Afrikada bari. Waxaa la xaqiijiyay in Carabta reer Yemen ay ka asaasseen ka hor qarnigii 4aad ee C.H, rugo ganacsi xeebaha Africada bari kuwaa oo ku xiran iyo gacanka Cadan, dhammaanna degaanadaas waxay hoos imaanaayeen Boqortooyada Mafartis (Macafiri) ee Yemen.

Waxaa xasuus mudan in Dekedda Mosilon ee dhici jirtay waqooyiga galbeed ee Raas Guarda–fui in ay aad caan u ahayd lana baratami jirtay Dekedda Xadramout ee dhacda koofurta koofurta Yemen.

Waxaa muuqata in Magaca **Macaafir** uu ku yar yahay kutubta taariikhda, hayeeshee, wuxuu u muuqdaa in adeegsigiisa uu socday waqtigii dowladdii **Ximyar**. Reer Macaafir, waxaa lagu sheegaa in ay ahayeen qabiil Yaman ah oo ay awooddiisa baahday kuna fidday gudaha iyo debedda Yemen ilaa iyo xeebaha waqooyi iyo kuwo bari ee Soomaaliya.

**Magaca 7aad waa AZANIA (AZAANIYA):-**

Magacaan wuxuu aad uga caansan yahay kana cimri dheer yahay kii aan hore u soo xusanay ee MACAAFIR, tilmaama ayaa muujinaya in uu baxay ka dib qarnigii koowaad ee C.D, magaca Azaaniya ayaa u gaar ahaa xeebta bari iyo tan koonfureed ee Somaliya. Arinkan waxaa caddaynaya khariidada Bateleymus (Ptoleymy) Qarnigii 3aad C.D iyo mid kale oo ku soo baxday kitaabka Priplus ee xeebta gacanka Cadan iyo xeebta bari ee Somaliya iyo xiliyo ka sii horeeyay kuwa kor ku xusan sida ka muuqata labada khariidadood.

Waxaa sugan in dowladdii **Ximyar** ee Yemen ay xukuntay qayb weyn oo ka mid ah dhulkii loo yiqiin AZANIA (Somaliya). Waxaa taa ka duwan oo la sheegayaa in magaca Azaania uu ka soo jeedo CAZAAN oo ahayd boqortooyo dalka Yemen ka jirtay oo ay dadkeedu u soo guureen xagga bariga Afrika, Islaamka ka hor. Arinkan ayaa dhaliyay iska hor imaad xooggan oo ka dhax dhacay dadyawgii dhoofku ku yimid ee Azaania iyo qawmiyadihii Afrikaanka "Kuushiyiinta" ahaa ee hore u degenaa Afrikada bari ee kala ahaa Gaalla, Soomali iyo Masaay,

kuwaa oo ku guulaystay in reer Azania u riixaan dhinaca koofureed baabi'yeenna raadkii ilbaxnimo ee ay reebeen. Magacan AZANIA waxaa la sheegay in ay bixiyeen Romankii qabsaday ee xukumay mudda aad u dheer xeebta Asiyada Galbeed (Turkiya iyo Shaam) iyo kuwa woqooyiga Afrika sida: Masar, Libiya, Tunisia, Al-Jeeriya, Marocco iyo Muritaniya Qarnigii 1aad ee C.D.

Magacaan AZANIA laguma arkin kutubta taariikhda iyo sida ay dhantahay maraajicda carabta iyo tan muslimiinta. Arinkan ayaa caddaynaya in uu magacaan baaba'ay intaysan Diinta Islaamka soo if-bixin, cimrigiisuna uu ku ekaa ilaa iyo dhammaadkii Qarniga-6aad C.D. Iyadoo ay sidaa tahay, haddana waxaa la xaqiijiyay in sumadda magaca Azania ay ku hartay dhulka dhaca koofurta Muqdisho. (SARAPION) iyo Marka (Nikon) sida ka muuqata maapka Priplus. (Q. 3aad C.D).

Kutubta taariikhda ama maraajicda waxay tilmaamayaan in dalkeenna loo aqoonni jiray magacyo ay ka mid yihiin: Xabashi, Barbar iyo Zinji. Waxaa mudan in la ifiyo in ay dadka Somaliyeed bilaabeen in ay dib u milicsadaan taariikhda iyo hidaha dheer ee ay lahaayeen dadka iyo dalka Somaliya. Raad raaca taariikheed ee Somalida waxaa ka mid in dib loo adeegsado loo isticmaalo magacyo dalka loo yiqiin sida aan soo xusanay. Waxaa dib loo soo nooleeyay magaca Puntland oo loogu magac daray maamul-goboleedka gobolada bari ee Somaliya. Sidoo kale, waxaa la soo jeediyay in dib loo sumad raaco magaca Azania looguna magac daro maamul goboleedka Jubbooyinka. F.G: waxaa mudan in la xuso in khariidooyinkii hore aysan ahayn kuwo wada sax ah, waayo aqoonta dunida loo lahaa ayaa ahayd mid aad u kooban marka lala barbar dhigo heerka dunidu marayso

manta. Iyadoo ay sidaa wax yihiin, haddana markii la baahdo in wax laga qoro, laga sheego xilliyadaa aadka u fog, waxaa lagama maarmaan ah in wax laga soo xigto hadba wixii xilligaa la sawiray ama la qoray.





Fig. 58. East Africa according to Ptolemy

## *Maraajic (References):*


1. Axmad Susinan: Al- Carab wal Yahuud fii al- Taariikh
2. Xiirka Carabta iyo Afrika: Machadka Cilmibaarista ee ALESKO, Sudan: 1979
3. Jullian: Document taariikheed ee bariga Afrika 1848
4. Xiriirka Carabta iyo Afrika oon soo xusnay
5. Isaga
6. P. Davizon: Afrika under new light.


| OLD NAME | NEW NAME | OLD NAME | NEW NAME |
|---|---|---|---|
| ALALAL ISLANDS | DAHLAK ISLANDS | MARKET AND CAPE OF SPICES | CAPE GUARDAFUI |
| COLOE | COHAITO | TABAE | RAS CHENARIF |
| MUZA | MOCHA | PANE | RAS BINNA |
| AVALAITES | ZEILA | OPONE | RAS HAFUN |
| MALAO | BERBERA | SARAPION | MOGADISHU |
| MOSYLLUM | RAS HANTARA | NICON | BRAVA |
| CAPE ELEPHANT | RAS EL FIL | | |
| MUNDUS | BANDAR HAIS | | |

*Fig. 55. Map showing places mentioned in the Periplus, their modern equivalents and imports and exports*

41

# TAARIIKHDII CIIDANKA BADDA SOOMAALIYEED

(Qeybtii 3aad)

ADM. GAAS FAARAX AXMED CUMAR

Sheekada Taariikhda Ciidanka Badda waxay inoo joogtay in markii uu dhashay kacaankii 21Oct 1969kii sida aan ku qornay dhamaadkii maqaalkii (Qeybtii 2aad) in Ciidanka Badda uu lahaa:-

1. 3 (Saddex) saldhig: Muqdisho, Berbera iyo Kismaayo oy joogaan min 2 (labo) markab oo ah XIL.
2. Laba Horin Madaafiicda xeebta ah oo ilaalisa dekedaha Muqdisho iyo Berbera. (2x4 madfac oo ah Kaliber 100mm).
3. 13 bar ilaalo (B.I.B) oo ku tixan xeebta min Zeylac iyo Raas Kambooni oo ku qalabeysan Radiyayaal, Raadaarro, Gaadiid iyo Qalabka Hawada lagu cabiro iyo 30 (soddon) Badmaax BIB kasta.
4. Hal Dugsi Farsamo oo ku yiil Xamar
5. Ciidanka Badda waxaa laga xakumi jiray Hoggaanka Ciidanka Badda (Direzione Marina) oo ka tirsan Hoggaamada X.D.S oo Talis madax bannaan ma jirin.

Mudadii u dhexeysay 1970-74, waa 5(Shan) sano ee waa mowduuca maqaalkeenna seddexaad ee taariikhda ciidanka badda oo si isdaba oog ah loogu faafiyo Majallada Juula – Jawaay.

Sanadkii 1970kii waxaa dalka ku soo laabtay Injineeradii wax ku soo bartay M. Sofiyet oo ahaayeen 8 (Siddeed) L/S, waxaana la wada siiyey Darajada 2xlle.

Injineeradaani waxay kala ahaayeen sidaan:-

1. Labo waxay ku takhasuseen makaanikadda, waxayna kala ahaayeen Faarax

Gurxan Cali iyo Cabdi Yuusuf.
2. Labana waxay ahayd Raadiyo yaqaan: waana Cumar Nuur iyo Cabdulaahi Jaamac (Il fuur).
3. Laba waxay ahayd Radarist, waana Cabdi Eelaay iyo Cabdulaahi Farabadne.
4. Labana waxay ahaayeen BADMAAXIIN (Navigation), waana Axmed Xaaji Cumar iyo Mowliid Xasan Faarax.

Horena waxaa u joogay 35 (shan iyo soddon) sarkaal uu ku jiro madaxa hoggaanka Ciidanka Badda: G/S Cali Xaashi Barre.

Sanadkii 1971dii waxaa ku soo biiray ciidanka badda 4(afar) markab oo yaryar hase yeeshee waa hub khatar ah, waa Torbeeto xambaarayaale.

Maraakiibta afarta ah mid kasta wuxuu watay 2(laba dhuun) oo laga rido torbeedka (D=350mm, L= 4000mm).

Afartaan Markab waxaa fadhiisin looga dhigay Dekedda Kismaayo. Maraakiibtaan uu hoggaaminayey 2xlle Cismaan Jibriil Xagar waxay ka qeybgashay Tababarkii Istraateejiga ahaa oo ka dhacay xeebta Cisalley (Waqooyiga Caasimadda15km) 1973dii oy ka wada qeybgaleen Ciidanka Dhulka, Ciidanka Badda iyo Ciidanka Cirka, waxaan ka qeybgalay Guddoomiyihii GSK Jaalle S/Gaas M. Siyaad Barre. Waxaa sharaf u ah Qoraha inuu ahaa madaxa howlgelinta Ciidanka Badda ee tababarkaas, iyo Taliyihii hore Horinta 1aad ee Mad. Xeebta oo tababarka ku jirtay.

1972dii waxaa la abuuray 3(saddex) Urur oo ah DILLAAXINTA BADDA (Marines) oo la kala dejiyey Saldhigyada Kismaayo, Muqdisho iyo Berbera.

Xilkooda weynina wuxuu ahaa in laga dejiyo xeebaha cadowga halista ku ah ayadoo la isticmaalayo maraakiib loogu tala galay howshaan oo imaan doonta.

1972dii waxaa loo abuuray Ciidanka Badda Talis Madax banaan, waxaana noqday Taliyihii Koowaad S/DH. Max'ud Geelle Yuusuf oo ahaa madixii Maxkamadda Badbaadada Qaranka. G/S Cali Xaashi oo loo dallacsiiyey S/Guuto waxaa loo magacaabay guddoomiyaha Wakaaladda Dekedaha Dalka, waxaa abbaanduule noqdey G/DH. Khaliif Macow Xasan (Taliye xig koowaad), madaxa siyaasadana waxaa noqdey Qoraha 2xlle Faarax Axmed Cumar (Faarax Qarre (Taliye xig labaad), sidoo kale waxaa lagu dhaqaaqay xoojinta waaxyihii hore u jirey, kuwo cusubna waa la abuuray, si Talisku uu u gudan karo xilkiisa hoggaamineed, Qorsheyn iyo kormeer; Taliska waxaa gacan siinayey iyo la taliyaal ka yimid M. Sofiyeet oo wax weyn ka taray, xagga sare u qaadidda aqoonta saraakiisha

1974kii wuxuu galay Ciidanka Badda marxaladiisii saddexaad oon ku magacaabi karo Xoogeysiga asagoo hore u soo maray marxaladii koowaad ee dhalashada (1950 – 1964) iyo marxaladii korintaanka (1964 – 1974).

Haddii Ciidanku hore uu ahaa mid Difaac hadda wuxuu isu diyaarinayaa inuu noqdo mid weerar.

Sanadkan, waa 1974 kiiye waxaa la diyaariyey askar (Badmaaxiin) iyo S/xigeen (Saraakiil Xigeen) oo hore u lahaa aqoon guud iyo mid farsamo oo la geliyey tababar lix bil ah inta aan loo dirin waxbarashadooda M. Sofiyeet. Waxaa sharaf u ah Qoraha inuu ahaa macallinkii cilmiga hantiwadaagga ee tababarkaas. Raggaan waxay wax ku baranayeen M. Sofiyeet 1974-

1975, waxaana la soo baray, dabadeedna ay ka shaqeeyeen, Maraakiibta dheereeysa ee Gantaalo – xambaarada ah iyo kuwo Torleedo – Xambaarayaal ah oo noqon doona maqaalkenna afaraad Inshaa allaah.


Maraakiibtaan weli dalka sooma gaarin waase la filaayey. Waxaa xusid mudan in Raggaan tababarka Xamar ku qaatay inta aan loo dirin dibadda uu ka mid ahaa Nuur Taqsiin, Taliye xig labaad ee Ciidanka Badda (G/Sare) ee hadda (2015).

Waxaa xusid mudan in L/S (Leyli Saraakiil) tiro badan loo diray M. Sofiyeet muddadii u dhexeysay 1971-75kii oo intooda badan loogu tala galay maraakiibta la filanaayey; waxaana ka mid ah G/Sare Cabdi Warsame Cismaan ku xig abbaanduulaha Ciidanka Badda iyo madaxa howlgelinta ee hadda; saraakiisha ururada dillaaxinta waxay ka imaan jireen billowgoodii hore Ciidanka Dhulka iyo Ciidanka Badda laftiisa.

Sida aad arkeysaan wax la sheegi karo oo tababar ama hub iyo qalab ah, Ciidanka Baddu kama helin dowlad aan ahayn M. Sofiyeet, saaxiibkeenii Eydoloojiyada Hanti Wadaagga. Waxa xusid mudan in M. Sofiyeet uu ka taageeri jiray Soomaaliya arrimaha siyaasadda, dhaqaalaha iyo bulshada, gaar ahaan waxbarashada ardeyda madaniga ah oo xagga difaaca kaliya kuma sinneen; Soomaaliduna waxay ahayd dowlad u qalanta in la isgarabtaago oo mudan hiil iyo hoo intaba oo saaxiibadeed wax u tari karta, lana tixgeliyo.



Dhexda Taliyaha C.Badda G/Dh Max'uud Geelle Yuusuf
Midig: Taliye – xig koowaad: G/Dh Khaliif Macow Xasan
Bidix: Taliye – xig labaad: 2xlle Faarax Axmed Cumar (Qoraha)
Taagan: Mlle Aadan Sheekh: Kaaliyaha



Maraakiibtii Torbeeda – Xambaarrada ee Soomaaliya ay ka heshay M. Sofiyeet 1972kii

## Taariikh nololeedkii 13kii wiil ee asaasay Xisbigii SYL Gobanimadoonka

Markii aan bilowno sheekada bilowgedii 15 may 1943 halgankii bilo ka hor malintaas waxaa galab kulmay C/qaadir Sheekh Seqaawudiin iyo Yaasiin Xaaji Cusman Sharmarke, labadaas oo ahaan jiray saaxibo aad isgu dhow, qulubtooda ay ka buuxdo jaceylka wadankooda qaaliga ah, way kulmeen waxayna ka sheekeysteen maamulka isticmaarka Ingiriiska uu Ummadda ku hayo iyadoo mid kasta uu xambaarsanaa fikrad uu u arkaayey in ay u wanaagsan tahay waddanka, C/qaadir wuxuu u arkayey in la aasaaso Urur Islaami ah oo xaqiijinaya wax yaabaha muslimiinta u baahan yihiin, Yaasiinna wuxuu u arkayey in la aasaaso Xisbi Siyaasi oo matala Shacabka Soomaaliyeed, dalbanaya macluumaadka wadanka, ugu dambeyn waxay isku fahmeen in la dhiso Xisbigii SYL markii la gaaray maalintii la balmay waxaa yimid tiradii loo baahnaa kadibna si rasmi ah baa loo furay waxaana loo sharaxay dadkii ujeeddada shirkaas lahaa, waxaana la diyaariyey waxyaabihii maamulka u ahaa kulanka, dood dheer oo saacado qaadatay kadib waxaa la gaaray sedax qodob oo kala ah:-

1. In loo gudbiyo codsi Dowlada gumeysiga Ingiriska in ay ogolaato in la furo gole magaciisu yahay Golaha Dhalinyarada Soomaaliyeed.
2. In la kireeyo guri ku haboon howlaha maamulka laguna soo duubo quluubta Dhalinyarada.
3. In ladajiyo barnaamij kumeel gaar ah kana kooban shaqooyin muhiim u ah golaha.

**Golaha 13ka Xisbiga SYL oo gobonimada soo gaarsiiyey Ummadda Soomaaliyeed waxay kala ahaayeen:**

| No | Magaca | Taakhriida uu dhashay | Magaalada/Gobolka |
|---|---|---|---|
| 1 | C/qadir sh. Saqawudiin | 1919 | Tiyeeglow/Bakool |
| 2 | Max'ed Xirsi nuur Siidii | 1915 | Mareeg/G.Gaduud |
| 3 | Yaasiin Xaaji Cusmaan | 1917 | Hobyo/Mudug |
| 4 | Xaaji Max'ed Xuseen | 1917 | Maqudisho/G.Banaadir |
| 5 | Cusman Geedi Raage | 1925 | Muqdisho/G.Banaadir |
| 6 | Dheere Xaaji Dheere | 1926 | Muqdisho/G.Banaadir |
| 7 | Daahir Xaaji Cusman | 1925 | Muqdisho/G.Banaadir |
| 8 | Cali Xasan Maslax | 1927 | Muqdisho/G.Banaadir |
| 9 | Max'ed Cali Nuur | 1917 | Muqdisho/G.Banaadir |
| 10 | Max'ed Faarax Hilowle | 1925 | Muqdisho/G.Banaadir |
| 11 | Xaaji Max'ed C/laahi Xayeese | 1918 | Muqdisho/G.Banaadir |
| 12 | Huudow Macallin Cabdulle | 1926 | Mareerey/Sh.hoose |
| 13 | Max'ed Cusman Baarbe | 1910 | Baardheere/Gedo |

Halgan dheer kadib dhalinyaradaas waxay Ummadda Soomaaliyeed gaarsiiyeen Xurnimo, 1960 waxaa la helay dowlad Soomaaliyeed oo calan leh uu Madaxweyne ka noqday Mudane Aadan Cabdulle Cusman, R/wasaarana loo doortay Mudane Max'ed Ibraahim Cigaal.

**Xuska 15 May**

15ka May waa maalin Ummadda Soomaaliyeed ku weyn mudanna xushmad iyo qadarin, waxayna xambaarsan tahay micna weyn, micnahaas wuxuu ugu fadhiyaa dalka baal dahab ah, waa maalin 13 dhalinyaro Soomaaliyeed u istaageen inay gumeysiga ka dulqaadaan dalka heystay iyo dhibka ay Ummadda ku hayeen kana xoreeyaan dhibaatadaas, sanad walba markii la gaaro 15ka May waxaa la sameeyaa munaasabad lagu xusaayo dhalinyadaas, bishii May 15 keedii ee lasoo dhaafay waxaa socod dheer laga soo bilaabay taalada daljir daahsoon, socodkaas waxaa hor kacaayay Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed Mudane Xasan Sheekh Maxamuud. Socodkaas waxaa lagu gaarsiiyey taalada SYL ayagoo sameynaya socodka rucleynta kadibna halkaas kaga qaatay ciidanka baanbeyda salaam sharafeed isla markaana ubax dhigay taalada SYL oo ah astaan lagu xasuusto dhalinyaradaas.

Wuxuu Madaxweynuhu halkaas ka jeediyey hadal dheer oo uu kaga hadlay taariikhda 13kii dhalinyaro ay soo hoyeen iyo halgankii dheeraa ay galeen. Ugu danbeytii wuxuu ku booriyey dhalinyarada Soomaaliyeed inay ku daydaan dhalinyaradaas 13ka ah ee soo halgamay kana xoreeyey gumeysigii saarnaa dalka.

**Tahriib:** Waa safar qarda jeex ah, berri ama bad oo uu qofku qorshaysto in uu si sharci darro ah ku galo wadan uusan u dhalan isagoo aan haysan ogolaashaha dal ku-gal ee loo yaqaan Visa. Si safarkaa qar iska tuur nimada ku dhisan uu u suurta galo, dadkan ayaa la qariyaa, si buux dhaaf ahna loogu raraa gaadiid taya hooseeya oo si sharci darro ah dadka loogu gudbiyaa dalal shisheeye.

Tahriibka waxa uu ka mid yahay fal dembiyeedyada loo la'yahay xalka. wuxuuna xad-gudub toos ah ku yahay Qawaaniinta Caalamka(5).

## Sababaha Keena Tahriibka

Sababaha ugu badan ee Tahriibka keena waxaa lala xiriiriyaa arima dhawr ah oo ay ugu horeeyaan:-

1. Naf la carar ku yimaada nabad gelya xuma.

2. Gaajo iyo fursad la'aan

sida shaqa yari, waxbarasha la'aan, adeeg caafimaad xumo IWM.

3. Caburin Diin ama caqiidada darteed.

4. Cibaado darteed, si loo gaaro goobo cibaado oo la xurmeeyo "muqaddas ah".(6)

5. Aqoon darro iyo wacyi hoosayn iyadoo dadku yeeshaan faham khaldan oo aan laga fujin karin, oo uu yahay biya dhiciisa in nicmo iyo nolol raaxa leh la helaayo haddiiba gayiga Somaliyeed laga

(5) Cumar Adan Deyb, qoraa soomaaliyeed

(6) xigasho hore.

baxo. Farqiga nololeed iyo hormarka ee u dhaxeeya wadamada dhaca woqooyiga dunida sida Yurub iyo Woqooyiga America iyo kuwa dhaca koofurta dunida oo ay ugu horeeyaan wadamada qaaradda Afrika.

**Dhibaatada soo wajahda Tahriibayaasha**

Dadka tahriiba ee sida qar-iska tuurnimada ah ugu safra dhulka lama degaanka ah iyo badaha kacsan, waxaa u badan dad da'yar ah oo raba in ay xaqiijiyaan riya aan dhab ahayn ama muuqaal aan la gaari karin. Sidaa darteed, dadka ku go'a ee ku waaya naftooda badda u dhaxaysa wadamada woqooyiga Afrika iyo Yurub ayay da'yarta Soomaalidu qayb wayn ka yihiin. Dhimashada dhallin yaradan ayaa ku reebta xanuun iyo uur ku taalla guud ahaan dadka Soomaaliyeed iyo gaar ahaan eheladooda iyo qaraabadooda. Xanuunkaa ayaa gaaray degaan kasta oo dalkeenna ka mid, meel nabdoon ama meel nabad-gelyadeeda hoosaysa tay-doontaba ha noqotee.

Tahriibka waxaa lagu sifayn karaa in uu ka mid yahay musiibooyinka ugu waawayn ee dadka Soomaaliyeed soo food saartay burburkii dawlanimo ka gadaal. Waxaa si ba'an u xasuuqmay tira aad u badan oo da'yarta Soomaaliyeed ka mid ah, in badan oo dadkaa ka mid ah ayaa ku nafwaayay wadada dheer ee u dhexeysa dalalka Sudan iyo Libiya. Fogaanta halka ay tahriibayaasha higsanayaan ayaa lagu sheegaa in aysan ka yarayn 600km waa masaafada la rabo in uu tahriibuhu gooyo.

Mudada ay masaafadaa goynteeda ku guda jiraan, sida badan dadka safarka ah waxaa ka go'a biyaha iyo baadka ay hore u qaateen. Waxaa dhacda in uu ciladooba gaadiidka ama jihadii loo socday la garan waayo. Sidaa owgeed waxaa dhammaada wixii la watay

oo saad ahaa. Waxaa timaadda dhimasho lagu sheegi karo in uu keenay hunguri wayni ama damac adduun iyadoo dadka Somalida ah ee tahriibaya aysan haynin waqtigan gaajo ama colaad bidda in ay qaataan khatartaa. Waa dhab in ay cabsiyahaa hore uga jireen Soomaaliya xilliguu dagaalka sokeeya bilowga uu ahaa, haddase Illaah mahaddiis arinkaa waa mid laga soo gudbay.

Khatart dabiiciga ah ee tahriibayaasha soo food saarta waxaa garab socda, mid uga imaanaysa burcada, taa oo ku keenta tahriibayaasha af-duub iyo madax furasho, ciddii kari waysa in ay madaxeeda furato, waxay waajahaysaa dhibaato iyo xad-gudub badan. Awoodda burcadda ma aha mid qarsoon, sida ay caan u noqdeen daraadeed ayay la magac baxeen "Ma-gafe" ama ma gafa-yaal. Tahriibayaasha oo sida badan aan sinna uga baxsan karin ma-gafe ayaa la kulma: xarig, jir dil, kufsi, addoonsi iyo dhimasho, haddii uusan qafku ka helin gargaar lacageed oo degdeg ah oo uu madaxiisa ku furto.

Waxaa wax laga xumaada ah oo aan weli maara loo helin in da'yarta Somaliyeed iyo kuwo kale oo badan oo la mid ah aysan weli ka waantoobin si kasta oo looga waaniyay, loogu caqli celiyay ama loo caddeeyay khatarta qofka la soo gudboonaan karta haddii uu u hoggaansamo tala xumida iyo riyada dhalanteedka ah. [7]

Kuwa badan ee weli ku fekeraayo waxaa uga filan waano iyo wacdi dhacdada bishii tagtay ee April 15, 2015, ee ay ku qur baxeen Badda dhexe ee "Mediterranean sea" dad lagu sheegay ilaa 400 oo ahaa muhaajiriin sharci darro ku safraayay kuwaa oo wada qur baxay, ka dib markuu degay markabkii ay saarnaayaeen. Waxaan la qiyaasi karin murugada

---

([7]) Axmed Xaaji Bakiin, December 1, 2014, Qoraa Soomaaliyeed

iyo uur ku- taalada dadka Soomaaliyeed iyo dadyowga caalamka soo food saarta had iyo goorba marka shacabka Yurub ee xeebaha degen ay ku waag bariistaan xeebtoodii oo uu mayd buux dhaafiyay, musiibadan ayaa ka hor-joogta kalluumaysatada in ay sii wadaan ugaarsigooda. Sidaa daraadeed tahriibku wuxuu noqday casrigan guul-darro soo food saartay adduunka oo idil, wuxuu sababay jaha-wareer, xal la'aan iyo quus, labada dhinacba, dalalka laga qaxaya iyo kuwo loo qaxaya. .

Baaxadda nasiib darrada ayaa sii durugtay ka dib markii la xaqiijiyay in dadka ku dhimanaya tahriibka ay ka mid yihiin caruur fara badan sida ay caddeeyeen hay'ada caalami ah oo daneeya nabad-gelyada caruurta. Hey'adda Badbaadada caruurta "**SAVE THE CHILDREN"**(8)

(8) Hey'adda bad baadada caruurta Save The Childern 15 April, 52015.

Waxaa calool xuma iyo uur ku taalla ugu filan dadka Somaliyeed in la arko hilibka iyo lafaha da'yarta Somaliyeed oo saxraaga Sudan iyo Libiya u dhaxeeya ku firirsan, halka qaar kala maydkooda la arko isaga oo dul sabaynaayo biyaha badda loo yaqaan Mediterranean sea.

Intaa waxaa dheer in kuwo kale oo badan ay ku jiraan xabsiyada dalal badan sida:- Itoobiya, Sudan, Libiya iyo Yemen, iyadoo lagu sababeeyo xariggooda safarka sharci darrada ah ee "tahriibka".

Waxaa suura gal ah in tahriibayaasha ay ku guulaystaan in ay gaaraan halkii tiigsigooda uu ahaa iyagoo nabad qaba sida dalka:- Malta iyo Talyaaniga. Hayeeshee, waxaa hubaal ah gaaridda uu tahriibuhu gaaro mid ka mid ah dalalkaa in aysan ka dhigneen in mirihii dhibka tarhiib sidaa lagu guran karo, dhabowdana riyadii barwaaqada iyo baraaraha lagu galaaraayay.

Waxaa laga yaabaa in uu qafku sharci waayo ka dib markii farahiisa/faraheeda looga qaado goobtii ugu horaysay ee uu Yurub ka soo caga dhigtay, taana ay keento in uu qafku ku dhex wareego wadamada Yurub muddo badan iyadoo sida heshiiska wadama Yurub yahay uusan wadanna siin karin magan gelyo qofka ka soo gudbay dalkii uu ka soo galay qaaradda Yurub. Tahriibuhu wuxuu uga beer daroobo waqti badan oo uu wax badan ku qabsan kari lahaa hadduu waddankiisa ku sabro. Waayida sharciga qaxootinimada ayaa keenta in uu tahriibuhu waayo meel uu harsado ama uu hoyaado. Qofka ayaa sidaa ku waaya in uu helo fursad uu ku shaqaysto ama uu wax ku barto. Waxaa ka xerma fursad kasta oo uu qafku nolol ku dhisan kari lahaa.

Haddaba da'yarta, waxaa la gudboon in si dhab ah u fekeraan kana foojignaadaan qaxa qar iska tuurnimada ah ee aysan u meel dayin. Ka qayb qaataan sidii ay Soomaali u yeelan lahayn talo iyo tigaad ay wax ku qabsato, si dib u dhis iyo hormar loo amba qaado. Taa waxaa lagu gaari karaa in da'yarta halka ay dhabarka u jeedinayaan dalkooda ku jira marxaladdan adag, qaybna ka noqdaan taaba gelinta nidaam dawlad oo soo celiya rajada guud ee dadweynaha Somaliyeed gaar ahaan tan da'yarta si ay u gaaraan himilada wanaagsan ee ay ku taamaayaan aayaha noloshooda. Dhallin yarada ayaa laga filaa in ay sare u qaadaan gaashaan n ay iskaga caabiyaan jahliga, aqoon yarida, sixun ugu dhaqanka qabiil iyo bisayl la'aanta sida xun ugu baahday dadka Somaliyeed. Sidaa waxaa ku midooba cududda muruqa iyo garashada maanka. Isu gaynta awoodahaa ayaa lagu gaaraa xasilooni, dib u dhis dhammaan kaabayaasha hormarka si dib loogu yagleelo maamuuska iyo sharafta dadka iyo dalka

Soomaaliya oo muddo cirka ku laalnayd. Haddii uu dhaboobo, lana helo amba qaadkaa, nicmada iyo barwaaqada geedka dheer saran ama laga baadi goobayo masaafooyinka dhaadheer iyo dalal shisheeye oo fog, kuwaa oo ku kala yaal qaarada kale. Waxaa hubaal ah in ay dhaboobayso himilada dhallin yarada Somaliyeed, gondaheenna ama lugaheenna hoostooda laga helaayo waxa lagu raadinaayo naf biimayn iyo qar-iska tuur. Ma aha wax mala awaal ah in dalka Somaliya uu hodan yahay, khayraad badan uu leeyahayna ay ceegaagaan barriga iyo badaha dalka.

Majirran wax naga horjoogo oo aan ahayn dhaqan xumi iyo garasha hoosayn. Haddii Soomaalidu ay wada qaadato aragti wadanka dan u ah, iska fogaysa shakiga ku kala dhex jira, gacmagacmaynta shisheeye ee aan saaxiibnimada iyo xiriir-wanaagga ku dhisnayn, isku kalsoonaato, is kaashato, Allaahna maciinsato. Taa waa tubta talada habboon ee shaki la'aan ka dhigayso Soomaaliya dalkii fursadaha "Land of opportunity" laabaysana boggii macaluusha iyo gaajada ee galaafatay dad badan oo noloshooda dadka iyo dalka wax ugu fadhisay.

Qore: Axmed Cumar Abshirow
Email: xuush@hotmail.com

# Xiriirka Akhriska iyo Hormarka Mujtamaca (Bulshada)

Qore: Abukar Sheikh-Abdi Ibrahim Ex. Wasiir ku-xigeen,
Wasaaradda Maaliyadda & Qorshaynta

## Hordhac:

Erayga "***Akhri***" wuxuu ahaa eraygii ugu horeeyay ee uu Allah ku soo dejiyay ***Nabi Muxamed "Naxariis & Nabad-gelyo korkiisa ha ahaatee".*** In uu la yimaado Nabiga Muxamed xirfad akhris ayaa ahayd mucjiso ama lama filaan, isagoo "Ummi" ahaa darteed oo aan hore u lahayn xirfad akhris iyo mid qoraal toona. Qiimaha iyo heerka akhriska oo sareeya dartiis, ayuu Allah ka dhigay akhriska mid waajib ku ah Nabiga ka-gadaalna umaddiisa.[(1)]

Akhriska waxaa xirfad Allah lagu caabudo, lagu barto magacyadiisa iyo awoodihiisa baaxadda wayn, waa furaha aqoonta iyadoo aan marna la gaari Karin aqoon noocay doonto ha noqotee akhris la'aan. Akhriska wuxuu fir-fircooni geliyaa awoodda dareenka qofka, xoojiyaa xiriirka qofka iyo aqoonta. Waa tubta lagu gaaro iimaan hufan oo uu qofku yeesho, wax looga ogaado asraarta iyo mucjizaadka Eebbe ee ku qarsoon khalqigiisa faraha badan ee ku kala nool dhulka iyo cirka[(2)] .

Dhinaca kale, akhriska waa awood arag oo lagu cabiro cod ama cod la'aan, taa oo uu qafku wax ku fahmo, wax ku saameeyo ama ku saamoobo, waa awood wax ku

kordhisa qofka iyo bulshada fahamkiisa/fahamkooda, aragtidiisa/aragtidooda. Akhriska waa xirfad wax lagu dhiraan-dhiriyo, lagu garto macnaha muuqaalka maaddo ee qoran, laguna furfuro astaamaheeda oo ay xuruuftu ugu horeeyaan IWM. Waa xirfad kordhisa, tayaysa dareenka iyo xasuusta qofka, u gudbisa caqliga ama xiska garashada aqoon iyo macluumaad aan looga maarmin nolosha iyo hormarka, kali ama koox (qof ama bulsho). Akhriska, waa aalad dhaqaajisa xiska garashada iyo fekerka, raadna ku yeelata in aadanaha noloshiisa uu is bedel ku dhaco, laga guuro heer hoose, suurta gelisana in sare loo kaco.

**Ahmiyadda akhriska**

Akhriska waa halbeegga lagu qiyaaso heerarka hormar iyo ilbaxnimo ee ay bulsho leedahay ama mid dib u dhac iyo harsanaan. Qofba qofka kale inta uu ka akhris badan yahay ayuu ka aqoon badan, sidaba bulshooyinka, bulshaba bulshada kale inta ay ka akhris badan tahay ayay ka hormarsan tahay. ***Mufakirka caanka ahaa ee Futeer, ayaa yiri mar la***

***waydiiyay, yaa umad hogaamiya? "Waxaa umad hogaamiya kuwa yaqaan sida wax loo akhriyo".*** Waxaa la yiraahdaa, ***akhristaha maanta waa hogaamiyaha berrito***. Si taa hore ka duwan waxaa u cabiray ahmiyadda uu akhriska leeyahay, gabyaaga carbeed ee caanka ah: **Abu-Dayib Al-Mutanabbi**, wuxuu tix gabay ah ku cabiray, in uu akhrisku yahay mid nafta geliya dareen raaxa leh iyo rayrayn: " ***Dunida meel la joogo waxaa ugu sharaf badan faras hawada dabaasha dushiis*Wehel iyo wax waqti lala qaatana waxaa ugu fiican kitaab aad akhrisato"*** (3) Waxaa la rumaysan yahay in akhris la'aanta uu yahay asbaabta keenta isku dhaca dadyawga dunida iyo is faham la'aanta. Xaqiiqadu waxay tahay in uusan jirin mujtamac hormar ku tallaabsan karo akhris la'aan. ***Qafka aan wax akhrin kama daraja sareeyo qafka aan akhriska aqoon.(4)***

**Faa'idooyinka akhriska:**

1. Akhriska waxaa lagu gaaraa aqoonta dunida hor iyo hadda (taariikh hore iyo tan casrigan).
2. Waxaa lagu gaaraa hodan-tinimo garasho.
3. Wuxuu soo gaabiyaa waqtiga, isaga oo ka dhiga akhristaha, sidii asaga oo la nool, feker iyo aqoonna la wadaaga dad qarniyo ka hor geeriyooday.
4. Waxaa lagu helaa awood xeel-dheera nimo ah oo wax lagu rogrogo ama lagu qiimeeyo.
5. Waxaa Lagu bartaa erayo iyo weerooyin cusub kuwaa oo xoojiya awoodda hadal iyo tan qoraal ee qofka.
6. Wuxuu sare u qaadaa fahamdka qofka uu ku garto waxa ka dhacaya agagaarkiisa.
7. Wuxuu sare u kiciyaa kalsoonida qafka.
8. Wuxuu kordhiyaa awoodda iyo qaabka wax cabiridda, meeshana ka saaraa cabsida ama yaxyax qafka la soo gudboonaado marka hadal la jeedinaayo.
9. Waxaa lagu helaa in laga madax-bannaanaado, laga xuroobo ciriiriga, caadada iyo dhaqamada hore.
10. Waxaa lagu gaaraa hal-abuurnimo, kaydka macluumaadka akhristaha oo sare mara darteed, lagu yeeshaa codkarnimo, taa oo akhristuha ka dhigta mid xishmad iyo qadarin lagu wada fiiriyo, qofka oo soo jiidasho yeesho darteed.
11. Waxaa lagu gaaraa faham iyo awood dood wadaagid, taa

oo bulshada ka fogaynaysa dagaalada iyo gacan ka-hadalka ku yimaada bisayl la'aanta iyo aragti hoosaynta.

12. Waxaa lagu yeeshaa hal-adayg uu akhristuhu ku fuliyo go'aammo adag.
13. Wuxuu kobciyaa xirfadda iyo awoodda cilmi baaris ee qafka. (4)

**Wax-yaabaha akhriska dhiirra-geliya**

1. In la helo niyad ama rabitaan xooggan
2. In la helo qorsho akhris iyo waqti akhriska u gaar ah maalin iyo bil walba.
3. In akhriska laga bilaabo buugaagta/kutubta fudud ama yaryar ka hor inta uusan u gudbin kuwa adag ama waawayn.
4. In lala yimaado dhab iyo dhiiranaan lagu doonaayo in lagu gaaro aqoon. (5)
5. Siyaasadadaha furfuran ee dawladaha, kuwaa oo uu nidaamkoodu dhiira geliyo akhriska ka baxsan manaahijta waxbarashada.

**Arimaha akhriska hoos u dhiga**

1. Faham la'aan faa'idada akhriska
2. Ka bilaabidda akhriska buugaagta/kutubta waawayn ee uu heerkood sareeyo, ka hor buugaagta/kutubta yaryar ee fudud.
3. Inuusan akhristuhu haysan saaxiiba la jaal ah (la da' ah) kuwaa oo jecel akhriska.
4. Inuusan akhristuhu haysan dad ku dhiira-geliya akhriska.
5. In uu akhristuhu yahay qof si degdeg ah u caajisa ama aan lahayn sabar uu wax ku akhriyo.
6. Dhererka xad dhaafka ah ee mawaadiicda la akhrinayo.
7. Waqtiga oo lagu dilo akhrinta qoraallo yaryar sida majalladaha, jaraa'idka ama internet ka aan faa'ida badan lahayn. (6)
8. Siyaasadaha kali taliska ee xerxeran ee dawladaha qaar, kuwaa oo uu nidaamkoodu ka soo horjeeda in la akhriyo wax ka baxsan manaahijta waxbarasho, cabsi ay awooddooda u qabaan darteed.

**Qaybaha akhriska**

1. Akhris cod sare u qaadid.
2. Akhris cod hoos u dhigid ama cod la'aan
3. Akhrin caadi ah (1-3: Waxaa ka siman dadka wax akhrin kara oo idil).
4. Akhris degdeg ah.
5. Akhris hoos u eegid (diirad saarid).

6. Akhriska sadarada.
7. Akhriska inta u dhaxaysa sadarada.
8. Akhriska waxa ka dambeeya sadarada.
9. Akhris ballaaran. (7)
10. Akhris dhinacya badan.
11. Akhris wacyi (4-11: Waxay gaar u yihiin dadka leh aqoonta dheeraadka ah, gaar ahan kuwa ku-hawlan qoraalka iyo cilmi baarista, ganacsiga iyo maal-geshiga, maamulka iyo maaraynta siyaasadaha dawladaha).

**Heerarka akhriska**

1. Heerka akhriska xuruufta, waxaa lagu fahmaa waxa qoran.
2. Heerka eray bixinta, waxaa lagu gaaraa eray bixinta iyo rogrogidda afkaarta si loo gaaro natiijo lagu qeexo hab dhaqanka qaf ama bulsho.
3. Heerka shiilidda afkaarta, waxaa lagu gaaraa in la qiimeeyo waxa qoran, la ammaano ama loo dhaliilo, si loo xalliyo mushkiladaha la xiriira xod-wareedyada, sheekooyin/qisooyin, ama dadaalada waxyaabaha cusub lagu curiyo.

**Xeeladaha barashada akhris badan**

**1.** Waxaa habboon in uu qofku akhriyo mawduuc uu si gaar ah u xiisaynaayo.

**2**. Waa in uu qofku isku-hawlo, in uu mawduuca uu danaynaayo ka raadiyo inta u dhaxaysa 2-10 buug/kitaab.

**3**. In uu qofku naftiisa ku ballamiyo in maalin kasta uu wax akhriyo saacad barkeed bisha koobaad, bisha labaad hal saac, bisha seddexaad saacad iyo bar, sidaana uu u kordhiyo si uu ula fal galo akhris badan oo saacado qaato, qaybna ka noqda nolosha akhristaha.

**Gunaanad**

Akhris la'aan waa mugdi, waa aqoon darro, waa dib u dhac, muuqaalka qofka aan wax akhrin wuxuu la mid yahay sawir beeneedyada ay beeralayda ku cabsi geliyaan shimbirta iyo xayawaanka duur-joogta si aysan wax u yeelaynin dalagga beeraha, ama humaag kurtun habeen mugdi ah meel fog ka soo muuqda, kaa oo cabsi geliya dhallaanka reer guuraaga ama safarka aan degaanka aqoonta u lahayn iyadoo la moodo dugaag dadka wax yeelleeyo ***(Kurtun yahaw waxa aan ku mooday mase waxaad noqotay***) (8). Qofka aan wax akhrin wuxuu noqonayaa qof dhoohan oo

aan war u hayn ama odorosi karin waxa agagaarkiisa ka dhacaya, la jaan qaadi Karin waxa dhacaya hadday noqon lahayd ka faa'idaysi ama ka hortag iyo iska caabin khatar jirta ama mid soo socota. Wuxuu noqonayaa qaf la jirkiisa ay dadka cuslaystaan, garasha xumidiisa iyo faham hoosayntiisa darteed. Waxaa ku adkaanaysa in uu kasbado bulshada si guud iyo si gaar ah, haday noqon lahayd la wadaagid dan/maslaxo, shaqo dalbasho ama raadin, xod-xodasho ama shukaansi haween.

Waxaa la tilmaamaa inaysan baahan, saboolnimana u dhiman umad ay dadkeedu wax akhriyaan, mana ogolaato quursi ama gumaysi. Akhriska ayaa dhaxashiya umadaha awood ay uga gudubaan duruufaha adag ee ku yimaada, musiibooyinka dabiiciga ah sida: fatahaadaha/daadadka, dhul-giriirka, baraakiinta, dabka iyo dabaylaha wax burburiya, cudurada faafa, ama dhibaatooyinka uu aadanaha isaga iskiis isugu keeno, sida dagaalada ama dhaqaala-xumida hoos u dhiga hanka iyo sharafta bani-aadanka, kaa oo ku bixiya da'yarta quus iyo qar-iska tuurnimo aysan u meel dayin waxa ku imaan kara naftooda, ehelkooda iyo wadamadooda. Dagaalada iyo hoos u dhaca dhaqaale, badanaa waxay ku yimaadaan sida ay taariikhdu xusto aqoon yari uu sal u yahay akhris la'aan, sidaana waxaa ku yimaada damac iyo caqiidda xumi abuurta han hunguri wayni ku dhisan oo ay tira yar yeelato taa oo bulshooyinka ka tirsan, maroorsata, gacantana ku dhigta xoolaha iyo hantida ay dadku wada leeyihiin, uguna takri-fasho si dareen la'aan iyo xishood darra ah, tiradaa yar ayaa la galbata wixii dadka ka dhaxeeyay si dahsoon iyo si muuqata, sidaana waxaa ku baaba'da danta guud ee ay dadku wada lahaayeen, bulshadana ku kala faqooqantaa, nacayb iyo xiqdina ku abuurmaa. ***Nabigeena Muxamed ayaa laga soo xigtay in lagu dhihi doono qafka Qur'aanka saaxiibka la'aahaa intuu noolaa " akhri Quraanka sidii aad u akhrin jirtay, degaankaaga Jannada wuxuu noqonayaa hadba meesha aad ku dhamayso aayadda ugu dambaysa ee aad akhrisid) "XadithXasan".*** (10)

## Tix-Raac:


1. Al-Qura'aan Al-Kariim: Suurat Al-Alaq, 97: "Aaya 1&3
2. Cabdi Al-Hamid Shamsu-diin, Tacriif Al-Qiraa'a "Mutafariqaat adabiyah", Maarso, 2014, http//.www.mawdoo3.com/%D8%AA%.
3. Ibraahiim Al-Fiqi "Xikmado la xiriira akhriska iyo kutubta,"www.araquoters.com/quotes/
4. Dr. Daariq Zaydaan, Youtube, Qeexidda macnaha cilmiga ee kitaab iyo buug.
5. Samiir N. N., Ahmiyadda akhriska, 21 April, 2009. www.Semo15.yoo5.com/t45-topic .
6. Mawsuucat Wiikiiidiya, Akhirka iyo ujeeddooyinkiisa, www.ar.m.wikipedia.org/wiki/
7. Isla kii hore
8. Sheeko Somali
9. Dr. Faysal Al-Thaani, Al-Qiyaada wa atharuhaa fii kasbi al-walaa, Daar Wujuuh li-tawziic, Al-Riyadh, Sacuudi Carabiya. 2013.
10. Dr. Rajaa Duwayri, Al-Baxth al-cilmi, Daar al-fikr al-mucaasir, 2005
11. Sunan Abdii Daa'uud: www.ahlalhdeeth.com/vb/showthread.php?t=289201

Waxaa mahad is ka leh Allaha abuuray Caalamka, ku maamula awooddiisa iyo xikmaddiisa, u soo bixiyay Nabi Maxamed, naxariis iyo nabad-gelyo korkiisa ha ahaatee, si uu dadka ugu ifiyo waddada xaqa ah ee toosan.

Qoraalkan wuxuu daba socdaa qoraal hore oo aan uga hadalnay dhibaato iyo faquuq lagu hayn jiray haweenka Islaamka ka hor, taa oo lala barbar dhigay sida uu Islaamka uga dul-qaaday haweenka caburin iyo qiima dil soo jireen ahaa. Diinta Islaamka waxay u soo celisay haweenka kaalin mug leh iyo xuquuq badan oo mudda dheer ka maqnayd, hadday noqon lahayd mid haweenka u gaar ah ama mid ay la wadaagaan ragga.

Maqaalkan waxaan ku qaadaa dhigi doonnaa xuquuqda ka dhaxeysa lamaanaha is qaba. Diinta Islaamka guud ahaan waxay siisay qof walba xuquuq iyadoo isla mar ahaan taana saartay waajibaad, labada is qabta waxaa midba goonigiisa loosiisay xuquuq uu ku leeyahay dhiggiisa kale iyo waajibaad laga rabo in ay ka soo dhalaalaan, si wada jir ahna ay u ilaaliyaan.

Xuquuqda ka dhaxeysa lamaanaha is-qaba waxaa loo kala qaadaa sidan:

1. Xuquuqda haweeneyda ay ku leedahay ninkeeda.
2. Xuquuqda ninka uu ku leeyahay xaaskiisa.
3. Xaquuqda ka dhaxeysa labadooda.

XUQUUQDA HAWEENAYDA XAASKA AH

Xuquuqda haweenka ay raggooda ku leeyihiin way badan tahay, hayeeshee, qormadan waxaa ku soo koobayaa xuquudan soo socota:

**1-Xaqqa Meherka:**

Meherku waa hanti uu Allaah faray in ay ragga siiyaan haweenka, ka gadaal marka uu dhaco nikaax ama guur.Tirada xoolo/lacag ee ay haweenaydu yeelanayso waxaa go'aankeeda iska leh gabadha , cid kale ma go'aaminkarto ogalaashaeeda mooyee, Waxaa sunna ah in meherka la yareeyo, si dhaqsi ah loo bixiyo. Shareecada Islaamka waxay ogoshahay in la hormariyo hal marna la wada dhiibo, dib loo wada dhigo, la kala qaado qayb la

hormariyo qaybna dib loo dhigo bixinteeda.Hayeeshee, waxaa waajib ah in lagu saleeyo bixintiisa hadba haweenayda rabitaankeeda, waana in la siiyaa/heshaa haweenayda hadba goortay dalbato oo ay u baahato.

Allaah sareeyee ayaa ragga faray in ay bixiyaan meherka, sida macnaha aayaddan ay caddaynayso: "Siiya haweenka meherkooda asagoo waajib ah haday idin kaga raali noqoto wax kamid ah naftooda cuna ..."(1).

Waxay muujineysaa Aaydaan in meherku yahay xaq ay leeyihiin haweenka, hayeeshee, sida badan Soomaalida ayaa aaminsan in haddiiba uu yimaada bixin meher uu u dhigmo furiin ama kala tagid, fahamkan ayaa ah arimaha dhaqan ahaan loo qaatay, hayeeshee, diin ahaan khalad ah.Bixin la’aanta Meherka wuxuu u dhigmaa dayn uu qafka ka gaabiyay bixinteeda taa oo nolol iyo geeri ka gadaalba qafku qoorta u surnaanaysa ilaa qafka uu iska bixiyo ama la helo qaf ka bixiya saboolnimo ama geeri darteed.

**2-Xaqqa Nafaqada (Masruufka)**

Islaamka waxa uu saray ragga xilka masruufka qoyska, waa waajib in ay siiyaan biil ku filan baahida haweenka uu u dhaxay iyo caruurta ay dhaleen.Waajibkaa gudashadiisa, ayaa lagu jaan gooyay awoodda hantiyeed ee uu qofka ragga ah uu Allaah ugu deeqay. Waa sidan amarka Eebbe "Ha quudiyo (Masruufo) kan awoodda xoola/dhaqaale leh si u dhiganta awoodiisa, kan saboolka ahna ha bixiyo hadba sida ay tahay awooddiisa"(2)..

**3-Xaqqa Hoyga iyo Marasheynta (Aradbax)**

Marashaynta ama arad bixinta iyo dejinta hoy ama guri munaasab ah oo loo taabba geliyo haweenka/qoyska ayaa ka mid ah waajibaadka uu Allaah saaray ragga. Haweenka ayaa helaya xuquuqdaa inta ay ku sugan yihiin xilanimada raggooda ama ay ku jiraan mudada ciddada u socoto furiin ka gadaal.

**4- Xurmaynta iyo ka dhowrid dhibaato**

Xaquuqdu ay haweeneyda leedahay waxaa ka mid ah in ay helaan maamuus ama xurma iyo dhibka oo laga dhawro, haday ahaan lahayd hadal, gacan ka hadal, ama hab-dhaqan.Waxaa reebban oo ay Diinta Islaamka si adag meesha uga saaraysaa in la dhibaateeyo haweenka. Sida ay

tusinayso macnaha ayaddan "Haysta haweenka oo si habboon u dhaqda ama si wanaagsan u siiya madaxooda.hana u haysanina inaad dhibtaan si aad u xad gudubtaan "[3]

## XAQQA UU NINKA KU LEYAHAY XAASKIISA

Islaamka waxa uu siyay ninka xuquuq uu ku leyahay xaaskiisa si la mid ah xuquuqda ay ayadu ku leedahay, waxaana ka mid ah xuquuqdaasi arimahan:-

### 1-Xaqqa Maamulka

Allaah wuxuu ragga saaray maamulka guryahooda/qoysaskooda, halka uu haweenku faray in ay u hoggaan-samaan raggooda, inta uu raggu u taagan yahay gudashada xilka xilahooda iyo guud ahaan qoyskooda.

Sida uu ALLE ku xusay aayaddan: "Raggaa u taagan(Maamulka)Haweenka, ka Fadilida ALLE qaarkood qaar iyo nafaqeynta xoolahooda darteed, haweenka wanaagsan way adeecaan ilaaliyaan maqnaashahooda ilaalinta ALLE darteed"[4]

Dhaga nugaylka haweenka iyo u jajabnaanta raggooda ayaa lagu saleeyay waxa uu sharciga ogol yahay oo kali ah.Haddii uu ninku siiyo haweenaydiisa amar ka hor imaanaya Shareecadda Islaamka, waxaa ka reebban haweenayda in ay u hoggaasanto.

In kasta oo uu Allaah siiyay ragga awood ku aadan maamulidda xaasaskooda/qoysaskooda, haddana Allah wuxuu siiyay haweenka kaalin ay kula wadaagayaan raggooda maslaxadda iyo aaya ka talinta mustaqbalka qoyska iyo tan guud ee bulshada. Nabi Maxamed ayaa looga dayanaayaa la wadaagidda haweenka aragti ama ka tala bixinta arimaha qoyska ama kuwo waawayn oo mararka qaar khuseeya dacwada Diinta Islaamka, dawladnimo ama siyaasad.

### 2-Ogalaasho bixinta

Allaah wuxuu faray haweenka in ay ogalaasha waydiistaan ragooda arimaha qaar sida:

b) Inaysan u ogolaan in uu guriga qoyska soo galo qaf uusan raalli ka ahayn ninkeeda. Haweenayda waxaa laga filaa in ay ilaaliso sharafta iyo maamuuska ninkeeda, tixgeliso waxa uu jecelyahay, kana foojignaato waxa aysan jeclayn naftiisa.

t) Inaysan ka bixin hantidiisa wax uusan ogolayn nocay doonaanba ha noqdeene, siismo ama hadiyad. Dhowrta nafteeda iyo xoolahiisa hadduu joogo iyo hadduu maqan yahayba.

j) inaysan soomin soon sunno ah isaga oo aan raalli ka ahayn. "uma banana haweeney in ay soonta ninkeeda oo jooga ilaa Idinkiisa la helo"[5].

**XUQUUQDA AY WADAAGAN LAMAANAHA IS QABA:**

Waxaa sidoo kale jira xuquuq ay wadaagaan lamaanaha isqaba, loona baahan yahay inay wada dhowraan, waxaana kamid ah arimaha soo socda:

1- **Dhaqan Wanaag**

Waxeey diinteena islaamka fareeysaa raga iyo dumarka is qabaa in ay ku wada noolaadaan dhaqan wanaagsan oo uu ku juro galgaceyl waana mid ka mid ah wax yaalaha loo jideeyay guurka, sidaa daraadeed waxaa loo baahan yahay in qof kasta uu ku dadaalo in uu kula dhaqmo qofka kale si wanaagsan, gaar ahaan ragga ayaa si toos ah ilaaheey u farayaa in ay kula dhaqmaan haweenkooda dhaqan wanaagsa, waxuuna ku yiri qur'aankiisa: "Kula dhaqma haweenka dhaqan fiican "[6]

2- **Haynta Sirta**

Islaamka wuxuu na farayaa in aan dhoowrno siraha dadka nagala dhexeeysa guud ahaan iyo gaar ahaan labada isqabta waxaa laga rabaa in ay dhawraan siraha iyaga u gaarka ah. Waxaan ka reebban lamanaha in ay fidiyaan ama ay ka waramaan sirta ay ka hayaan dhiggooda. Nabi Maxamed ayaa sheegay in qofka gudbiya sirta gogashiisa/gogosheeda inuu yahay kan ugu sharta badan maalinka qiyaamaha.

3- **Ixtiraamka Xididtinimada**

Guurka ayaa suura geliya ehelnimo/qaraabanimo. Sidaa darteed, wuxuu islaamku faray in lamaanaha dhowraan qof kasta qofka kale ehelalda uu ka soo jeedo/jeeddo, waxaa lagu sifeeyaa

in ay xididtinimadu tahay nimco Allah na siiyay.

### 4. Istimtaaca

Waxaa Ilaaheey uu faray labada is qabta in ay isu noqdaan kuwo uu araggooda is deeqo, midba midka kale uu ku eego il-raxmad leh, taa oo qaboojisa laabta, sidaa waxaa ku dhamays tirmayo macnaha iyo macaanka guurka. Lamaanaha xuquuqdooda waxaa ka mid ah in ay waqti wada qaataan oo ay wada raaxaystaan.Waxaa mudan in la xuso in ay raggu yihiin sida badan kuwa soo bandhiga baahida iyo rabitaanka haweenkooda, taana ay lagama maarmaan ka dhigayso in haweenku raggooda u hoggaansamaan oo ay ajiibaan haddaysan jirin sabab reebaysa.

Sidoo kale ragga ayaa laga filaa in ay fahmaan fariinta dareen ee haweenkooda, si ay baahidooda u buuxiyaan, maadaamma uu Allah ku gaar yeelay haweenka xishood, badanaana aysan ku dhiirran Karin in ay soo bandhigaan baahida ay raggooda u qabaan.

Arinka wuxuu xiriir la leeyahay Qawaamada uu raggu Eebba siiyay sida: xodxodashada iyo xulashada haweenka, doonashada iyo guursiga, qaadidda xilka marashada masaruufka IWM

Wadaagidda gal-gacalka, is-qadarinta, isu turidda iyo is gacan siinta ayaa ugu dambayntii soo hoynaya in lamaanaha isku indha qabawsadaan. Arimahaa ayaa ah yoolka ugu dambeeya ee ay xikmadda guurka hiigsanayso.

## Tixraac:

1) Qur'aan kariim: Surat Al-Nisa: Aayat: 4aad

[2] ) Qur'aan kariim: Al-dalaaq: Aayat: 7aad

[3] ) Qur'aan karrim: Surat Al-Baqara: Aayat: 231aad

[4] ) Qur'aan kariim: Surat: Al-Nisaa: Aayat: 34aad

[5] ) Xadiith: Saxiixul-Bukhaari, Bogga (1029)

[6] ) Qur'aan kariim: Suurat: Al-Nisaa: Aayat: 18aad

# DOWRKA WAX SOO SAARKA HAWEENKA SOOMAALIYEED

*“Farshaxanka iyo farsamada hiddaha iyo dhaqanka Soomaaliyeed”*

**W/D: Xuseen Maxamed Tuuryare**



Qormadan waxaan ku eegaynaa sooyaalka soo jireenka ah ee farshaxanka iyo farsamada haweenka Soomaaliyeed ay ku soo saari jireen qalab kala duwan oo siyaabo kala gadisan loo adeegsan jiray. Ayeeyada iyo hooyada Somaliyeed ayaa bari jiray una gudbin jiray gabdhahooda khibradaha farshaxan iyo dhaqidda qoyska inta ay korriinka ku jiraan si ay uga soo dhalaalaan xilka kaga aaddan dhaqidda iyo maamulidda qoysaskooda mustaqbalka dambe. Somaalida ayaa si baahsan u isticmaali jirtay qalab iyo alaabooyin badan oo ay gacmahooda ku samaysan jireen ka hor intaysan dalka ku soo badan alaabaha ay soo saaraan warshadaha dalalka shisheeye oo badankooda soo saara waxyaalo laga sameeyay birta, dhalada ama caaga. Alaabta Somaalidu soo saari jirtay waxaa badanaa laga samayn

jiray geedaha, dhirta yaryar, carada ama ciidda. Waxaa tusaale ahaan loo xusi karaa: dambiisha, dermaha, dufulka noocyadiisa kala duwan, dheryaha, saraf “xeero”, kurbin, fandhaal, qudde, kalax, dhiil, haan, qabaal, dhakal, bure, doobto, koor,  qamdi, masaar, qaanso, waran, mudac, minxaar, mindi, bilaabo, ablay, kabo, boorsooyin, xashin iyo qol “labadan dambe waxaa loo adeesan jiray sida jawaanka”, gaashaan  iyo dharka ragga sida hoos gunti “macaawis” maro rageed iyo mid haween oo lagu xaragoodo, maro la huwado, cimaamado, koofi iyo dharka haweenka sida guntiinooyin, garees, shaashash ama hagoog, cambuuro iyo saakooyin IWM.

Kaalinta haweenka Somaliyeed ayaa ahayd mid mug leh soo saaridda qalabka farshaxanka noocyadiisa kala duwan ee guryaha looga adeegto, halka ragguna ay ku wehliyeen soo saaridda qaar kale oo badan oo debedda guryaha looga baahan

yahay. Isugaynta alaabaha hidaha iyo farshaxanka ayaa ahaa kuwo sinna looga maarmin isticmaalkooda hadday ahaan lahayd heer qof iyo heer qoys.



Qalabka hidaha ayaa si baaxad leh u muuqan jiray gaar ahaan dambiisha oo ahaa kuwa ugu badan oo la arko marka ay adeeganayaan haweenka Somaliyeed, dambiisha ayaa ahayd mid noocyo iyo midaba badan oo lahaa qurux gaar u ah, waxaa dheer iyada oo uu asturan yahay adeegga ku jira, si uu qofba karaankiis u adeegto.

Ka hor bilawga qarnigan 21aad, Soomaalida waxay soo saari jirtay, ka ganacsan jirtay, ku adeegan jirtay alaabaha farshaxanka ee noocyada badan oo ay ku curin jireen fekerkooda si ay ugu haqab tiraan baahida noloshooda dhaqan iyo dhaqaale. Soo saaridda farshaxanka waxaa sal u ahaa maskax furnaanta iyo hal-abuurnimada dadka Soomaaliyeed ay taariikhda iyo hidaha u lahaayeen. Farshaxanka Somalida ma lahayn raad ama astaan farsamo oo ay farsama yaqaanada Soomaaliyeed uga daydeen waxa ay samaynaayeen oo ay ugu daw galayeen habsami u socodka nolol maalmeedkooda. Sidaa darteed farshaxanka Somalidu waxaa la dhihi karaa dhammaantiis in uu ahaa feker ka soo maaxday maanka iyo maskaxda Soomaalida kuna yimid curin maxalli ah oo aan loola kaashan khibrad kale ama ku dayasha shisheeye. Muddo qarniyo badan ah ayay Soomaalidu ku hanan jirtay qalabka farshaxanka noloshooda dhaqan iyo dhaqaale duruufaha iyo xaaladaha kala duwan ee hadba bulshada la soo gudboonaata hadday ahaan lahayd xaalad nabadeed, colaadeed, barwaaqo iyo abaar.

Alaabaha farshaxanka waxaa si xoog leh loogu arki jiray suuqyada magaalooyinka waaweyn iyo kuwa yaryar ee dalka iyagoo qayb ka ah dhaqdhaqaaqa ganacsiga. Waxaa xusid mudan in qalabka farshaxanka kaalin weyn kaga

jiray kobaca dhaqaalaha dalka isagoo ka mid ahaa ilaha dakhliga dalka soo gelisa lagacaha adag. Farshaxanka ayaa gali jiray ganacsiga gudaha iyo kan debedda gaari jirayna suuqyo badan oo ay ka mid yihiin kuwa wadamada deriska iyo suuqyo caalami ah oo ku kala yaal qaaradaha Afrika, Aasiya, Yurub iyo Woqooyiga Amerika.



Qalabka farshaxanka isticmaalkiisa ayaa u leh bulshada faa'idooyin iyo mudnaan caafimaadka dadka iyo bay'adda, isagoo marna aan ku lahayn raad saamayn xun ku yeesha jiritaanaka dadka, noolaha berriga iyo biyaha iyo guud ahaan bay'adda.

Hayeeshee, nasiib darro farshaxanka Somalida waxaa ku yimid hoos u dhac ka hor iyo ka gadaal dagaalkii sokeeye iyo mudadii dawlad la'aanta. Hoos u dhaca farsamooyinka maxalliga ah ayaa ah dhibaata caalami ah oo sida badan dunida soo koraysa la soo gudboonaatay dalka Soomaaliyana uu qayb ka yahay. Wadamada hormarsan ee warshadaha leh ayaa bar-tilmaamaystay wax soo saarka maxalliga ah ee wadama soo koraya, waxay bilaabeen in ay soo saaraan qalab warshadaysan oo u dhigma kii ay dadka dunida soo koraysa ay gacanta ku samayn jireen oo ka qiima jaban kana fara badan, dabadeedna waxay dib ugu soo diraan isla wadamadii farsamada gacanta ku hawlanaa iyo kuwii kale oo danayn jiray ka faa'idaysiga farsamada wadamada soo koraya oo ay Soomaaliya ugu horayso. Hormarka is-gaarsiinta dunida ayaa ka mid noqotay waxa hoos u dhigay wax soo saarka farshaxanka Soomaalida iyo guud ahaan wadama soo koraya sida: gawaarida, maraakiibta, doomaha, tareenada iyo diyaaradaha xamuulka qaada.

Arimahan iyo kuwo kale ayaa sal-dhig u ah in dadkii farshaxanka ku hawlanaa ayaa iska dhaafay waqti ku bixinta soo saaridda qalabka farshaxanka.

Farsama yaqaanadii farshaxanka, ganacsatada iyo macaamiisha ayaa dawr bidday isticmaalka alaabaha warshadaha sida fudud ku soo saaraan ee ka samaysan caagagta, dhalooyinka, bacaha iyo birta khafiifka ah, tira badnida iyo jabnaanta qiimahooda awgeed.



Haddii aan wax laga qaban sida ay wax u socdaan, waxaa shaki la'aan ah in ay muuqato in meesha uu ka bixi doono kayd, hidda iyo dhaxal taariikheed oo ay dadka Soomaalidu muddo dheer ku hawlanaayeen daryeelkiisa ama dhawriddiisa. Isticmaalka alaabta warshadaysan ayaa hoos u dhigay hammigii farsama yaqaanka Soomaaliyeed gaar ahaan haweenka, waxaa soo if-baxay wahsi la soo gudboonaaday macaamiisha iyo farsama yaqaanka oo dadkii dhan u jeediyay isticmaalka hadba waxa fudud ee ay gacanta gaari karto iyadoon waqti iyo xoolo badan midna aan lagu bixin.

Iyadoo ay jiraan duruufahaa adag ayaa waxaa nasiib wanaag ah in ay dalka ka jiraan dadaallo ay wadaan dadyaw iyo ururro maxalli ah oo dhammaantood ku raad joogo si uusan u baabi'in hidaha iyo dhaqanka Somaliyeed ee soo jireenka ah. Goobaha uu wax soo saarka noocan ah uu weli ka jiro waxaa ka mid ah deegaanka ***Gidhays*** oo hoos yimaada degamada ***Cadaado*** kuna aaddan dhanka bari qiyaas ahaan 14km. Degaankan waxaa ka jira urur haween oo ku hawlan samaynta iyo soo saaridda alaabta hiddaha iyo dhaqanka, iyadoo ujeedadoodu tahay inaysan cirib go'in hidaha Soomaaliya. Ururkan ayaa sameeya alaabo farshaxan ah oo ka kooban noocya badan, wuxuu sameyaa tallaabbooyin dhiira gelin ah oo uu ku soo bandhigo had iyo goor wax soo saarkiisa iyo alaabo kale oo dhammaantood ah astaanta hidda iyo dhaqanka dadka Soomaaliyeed. Ururka ayaa ka faa'idaysta munaasabadaha bulshada kulmiya sida: Ciidaha, maalmaha qaranka, aroosyada, buraanburka shaash saarka,

farxadaha kale ee lagu soo bandhigo ciyaaraha hidaha iyo dhaqanka, IWM. Alaabahan ayaa lagu isticmaalaa magaalooyinka iyo baadiyaha dalkeena. Sidaa si la mid ah ururka farshaxanka Gidhays ayaa gacan ka gaysta dhiira gelinta wax soo saarka dalagyada kala duwan ee beeraha degaankaa.

Ujeeddooyinka guud iyo kuwo gaar ah ee haweenka Somaliyeed ay ka lahaayeen samaynta qalabka farshaxanka ayaa kala ahaa sidan:

1. Haween alaabta farshaxanka u samayn jiray si xirfadle nimo ah ama hiwaayad iyo rabitaan gaar ah.
2. Kuwo danta yar, waxay u samayn jireen si ay uga kaal-maystaan nolol maalmeedka qooysas kooda una iib gayn jiray suuqyada maxalliga ah ama u dirsan jiray dalka dibaddiisa, si ay u helaan qiima ka wanaagsan kan gudaha.

Ilbaxnimada umadaha ayaa inta badan lala xiriiriyaa hadba sida bulsha kasta ay u ilaaliso taariikhdeeda, hidaheeda iyo kaydka soo yaalka jiritaankeeda. Hayeeshee, waxaa nasiib darro ah in Soomaaliya ay ka sii cirib tirmayaan farshaxankii soo jireenka ahaa ee ay bulshada ku naalloon jirtay. Farshaxanka ayaa si baaxad leh uga muuqan jiray carwooyinka, dukaamada iyo waratada ku ganacsan jirtay daafaha wadooyinka waawayn iyo jidadka magaalooyinka dalka. Haweenka ayaa har iyo habeen ku hawlanaan jiray falkinta cawda si ay u sameeyaan dambiisha, dirmaha, xaaqimada, ama maleegidda iyo kala saaridda dunta si ay u sameeyaan dharka hidaha ee loo yaqaan Aliindiga, dharka caruurta, koofiyadaha, naqshadaha lagu qurxiyo dharka ragga iyo haweenka sida sigsaagga iyo taraashka.

**Gunaanad:**

Sidaa darteed, waxaa lagama maarmaan ah in la qaado tallaabooyin dib loogu kobcinayo wax soo saarka farshaxanka Soomaalida, waana arin aan looga maarmi doonin in lagu tallaabsado gurmad qaran oo ay iska kaashadaan shacabka iyo hay’adaha dawladda Somaliyeed, si taa lo helo waa in la qaadaa abaabul wacyi gelin ballaaran miyi iyo magaalo, si ganacsatada, bankiyada iyo hay’adaha dawladda ay u dhiira geliyaan dib u hanashada farshaxanka iyadoo lagu bixinayo maal iyo muruq.

## Muuqaalka Maanta Iyo Maraaxisha Uu Soo Maray

## Maamul U Samaynta Gobolada Dhexe

Qormadan waxaan ku eegaynaa xaaladda hadda uu ku sugan yahay iyo heerararkii uu soo maray shirka maamul u sameynta Gobolada dhexe ee ay gogoshiisu taallo magaalada Cadaado kana furmay isla magaaladaa.

Sida la wada ogsoon yahay deegaanada labadan gobol ayaa ahaa kuwii ugu badnaa ee ay saameeyeen dadka ku nool colaadaha qabiil iyada oo uu gobolku ahaa halkii ay ka soo bilawdeen dagaaladii sokooye ee ugu dambayn burburiyay dawladda dhexe ee uu dalku lahaa tan iyo madaxbannaanidii midaysan woqooyi iyo koofur. Dhididibba u aasidda maamulada gobolada ayaa ah waddo lagu baadi goobayo in Soomaali dib

ugu hanato nidaam iyo kala dambayn dhaliya xasilooni iyo hormar guud ahaan dalka, gaar ahaan Mudug iyo Galgaduud. Hayeeshee, waxaan marna la filayn dadka labadan gobol in ay si fudud wax isula meel dhigaan, colaadda iyo kalsoonida darrada mudada dheer dhex tiil darteed. Iyadoo ay sidaa tahay ayaa waxaa dadka goboladan in ay yihiin kuwo ay ka suura galaysa fulinta ballanta nabadeed haddiiba ay gaariddeeda ku dhiiradaan. Waxaa intaa dheer oo la filayaa in labadan gobol qaadi doonaan wadda ka duwan tii ay qaadeen labadii maamul ee dhawaan lagu yagleelay Baydhaba iyo Kismaayo kuwaa oo ay ergada doorataay Madaxwaynaha Maamul Goboleedka, ka dibna la dhisayay Baarlamaan.

Shirwaynaha Cadaada ka socda ayaa la danaynayaa in ergada ay ku heshiiso xulidda xubnaha Baarlamaanka Dawlad

Goboleedka, ka gadaalna, Baarlamaanka uu doorto Madaxwaynaha oo ah sida habboon ee waafaqsan Dustuurka Dawladda Federaalka.

**Juulaay 30, 2014** ayaa qalinka lagu duugay heshiiska maamul u sameynta gobolada dhexe, heshiiskaa ayaa ka dhacay xarunta Madaxtooyada Somaliya iyadoo ay wada saxiixeen xubna ka kala socday maamulka Galmudug, Ahlu Sunnah Wal-Jamaaca, Ximan iyo Xeeb, Dowladda federaalka, iyada oo ay goobjoog ka ahaayeen erga kala duwan oo ka socotay beesha caalamka.

**Xubnaha heshiiska saxiixey waxay kala ahaayeen :**

1. Cabdi Xasan Cawaale Qeybdiid: Galmudug
2. Sheekh Ibraahim Sheekh Xasan Guureeye: Ahlu Sunna Wal Jamaaca
3. Cabdullaahi Maxamed Cali Baarleex: Ximan iyo Xeeb
4. Mustafa Sheekh Cali Dhuxuloow: Dowladda Federaalka
5. Ducaale Aadan Maxamed: Dowladda.
6. Axmed Cali Salaad Taako: Dowladda.
7. Mahad Axmed Salaad: Dowladda.

**Dammaanad-Qaade:**

Waxaa xilka socodsiin shirka qaatay Dowladda Federaalka ah oo uu hormuud u ahaa Wasiirka Wasaaradda Arimaha Gudaha iyo Federaalka xilliga uu heshiiska dhacay Mudane, Cabdullahi Goodax Barre. Dowladda Federaalka ayaa dhabarka saaratay fududaynta geeddi socodka shirka sida: bixinta dhaqaalaha, isku soo dhawaynta iyo u kala dab-qaadidda beelaha iyo ergooyinka.

Xukuumadda Federaalka ayaan la harin wixii ay kartay oo juhdi ama dadaal ahaa si uu shirku u noqdo mid mira lagu farxo la yimaada. Si uu amba qaadkaa u dhaboobo Dawladda Federaalka waxay saartay guddiga wasiirada ee ay magac yadooda hoos ku xusan yihiin.

1. Cabdullaahi Goodax Barre: Wasiirka arrimaha Gudaha iyo Federaalka
2. Mustafa Sheekh Cali Dhuxuloow: Wasiirka Warfaafinta
3. Ducaale Adan Maxamed: Wasiirka Hidaha iyo Tacliinta Sare
4. Mahad Maxamed Salaad: Wasiir ku xigeenka arrimaha dibada
5. Axmed Cali Salaad: Wasiir ku xigeenka Boostada iyo Isgaarsiinta

**Goobjoogayaalka beesha caalamka:**

1. Safiir Michele Cervone: Ergeyga Gaarka ah ee Midowgo Yurub
2. Safiir Maxamed Cabdi Affey: Ergeyga Gaarka ah ee Urur Goboleedka IGAD
3. Safiir Nicholes Key: Wakiilka Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramoda Midoobay
4. Marwo Lydie Wenyoto Mutende: Sii hayaha Wakiilka Gaarka ah ee Guddoomiyaha Ergada/Kumishinka Midowga Afrika.

**Agosto 26, 2014:** Wasaaradda Arrimaha Gudaha & Federaalka ee Soomaaliya ayaa ku dhawaaqday gudi farsamo oo ka kooban 27 Xubnood, kuwaasi oo loo xilsaaray Dhismaha Maamulka Gobolada Dhexe, Galgaduud & Mudug.

**Febraayo 10, 2015:** Madaxweynaha Soomaaliya Xasan Sheekh Maxamuud ayaa booqday magaalada Dhuuso-Mareeb, mar uu la kulmay

madaxda iyo bulshada goboladaas ayuu ku dhiira geliyay kuna adkeeyay in dhammaan gacan laga gaysto sidii ay ku taabba gali lahaayeen ujeeddooyinka shirka maamul u sameynta gobolada dhexe.

**Maarso 26, 2015:** Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud ayaa mar labaad booqday magaalada Dhuusa-mareeb, is-afgaran waa iyo dood badan ka dib, Madaxeynaha ayaa ku guulaystay in hoggaamiyaasha dhaqanka iyo waxgaradka magaalada Dhuuso-Mareeb ku qanciyo in shirka maamul u sameynta lagu qabto Magaalada Cadaado, Dhuusa-mareebna noqoto caasimadda Dawlad-goboleedka Mudug iyo Galgaduud. Go'aankaa iyo is-afgaradkaa ayaa la gaaray taariikhdu markay ahayd: 8dii bisha Abril, 2015.

**Janaayo 31,2015,** Waxaa furmay shirkii dib, u heshiisiinta ee magaalada dhuusa-mareeb, ugu horayn intii aan wax kale la guda galin, wuxuu shirku goddoomiyay in ergada shacabka labada gobol ay u qaadaan cafis guud oo dhex mara dhammaan qabaa'ilka iyo shacabka soo wakiishay ee degaanadaa ku nool. Tallaabadaa dambe ee is-afgaradka iyo dib u heshiiska ah ayaa suura gelisay in gogasha shirka loo raro Magaalada Cadaado.

**16 bisha Abril 2015**, waxaa si rasmi ah u furmay shirka mamul u sameynta gobolada dhexe ee mudada dheer la sugaayay, hakadyo iyo caga jiid badan ka gadaal, Madaxweyne Xasan shiikh Maxamuud ayaa furay kana codsaday madaxda dhaqanka, waxgaradka iyo guud ahaan shacabka labada gobol in ay dadejiyaan xulidda ergada shirka,

kana dhawraan shirka wax kasta oo xagal daacin kara.

Hayeeshee, dadaaladdaa oo dhan iyada oo ay jireen, haddana waxaa soo if baxay maalmihii ugu danbeyey ismaan dhaaf shirka kaga yimid kalsooni darro ay muujiyeen qaar ka mid xubnaha xil-doonka ah “Marashaxiinta” oo ka biya diiday sida ay guddiga farsamada wax u maamulayaan. Marashaxiinta qaar ayaa tilmaamay guddiga farasamada in uu yahay guddi sharci darro ku salaysan, sidaa daraadeedna aysan ku qabinna kalsooni, xurmana aysan u hayn.

Turunturooyin badan ka gadaal, waxaa la filayaa shirka in uu guulaysto, halkaana ugu dambayn lagu yagleelo mid ka mid ah maamul goboleedyada ka tirsanaan doona Dawladda Soomaaliyeed ee Federaalka ah. Waxaa xusid mudan, in uu is-bedel ku dhacay golaha wasiirada Xukuumada Federaalka intii ay socotay qabanqaabada iyo hawl galka maamul u samaynta gobolada dhexe. Sidaa darteed, waxaa hadda hawsha wada, lehna gacan ku haynta tooska ah wasiirka cusub ee Wasaaradda Arimaha Gudaha iyo Federaalka Mudane: Cabdirahman Odowaa. waxaana laxaliyay muranka wixi dhaliyay, waxaana 17 june 2015 la horgeeyay ergada dastuurka maamulkaas, waana la ansixiyay.

*<u>Qore: Axmed Nuur Xiireey</u>*

# GAROOWE: KULAN WADA TASHI OO DHIDABBADA LOOGU AASAAYAY NIDAAMKA FEDERAALKA SOOMAALIYA



Garoowe, 2 May 2015: Iyadoo laga ambaqaadayo shirkii 1aad ee Madasha Wadatashiga, ayaa waxaa magaalada Garoowe ee xarunta Maamul Goboleedka Puntand lagu qabtey shirkii labaad ee madasha 30 April ilaa 1da May, waxaa ka soo qeybgalay Madaxweynaha Jamhuriyadda Federaalka ah ee Soomaaliya, Mudane Xasan Sheekh Maxamuud, madaxda maamulada xubnaha ka ah DFS (Puntland, Jubbaland iyo Koonfur Galbeed). Waxaa shirka ka soo baxay war murtiyeedka hoos ku xusan:

Fulinta iyo Hirgelinta Heshiisyadii Horey loo Galay.

Dawladda Federaalka Soomaaliya iyo Maamulada xubnaha ka ah waxay isku afgarteen dardar-galinta iyo fulinta dhammaan

heshiisyadaas ay horay u gaareen dhinacyada, si arrintaasi loo gaaro

waxaa ka mid ah: in la magacaabo guddi isku-dhaf ah oo ka shaqeeya ilaalinta hirgelinta qodobadii lagu heshiiyey, sidoo kale waxaa la soo dhoweeyey wixii ka qabsoomay howlihii horey u socday xaga

Dastuurka iyo Arrimaha Federaalka.

Si loo dardargaliyo dib u eegista dastuurka, waxay madashu isku raacday in la dhamaystiro xubnaha ka dhiman guddiyada dib u eegista iyo kormeerka dastuurka ee ka imanaya maamulada xubnaha ka ah dawladda federaalka sida ku cad Qodobka 133 farqadiisa labaad xarafka (a) IWM.

Hiigsiga 2016 (vision 2016).

Waxaa la isku raacay in dalka Soomaaliya ay ka qabsoomaan doorashooyin xor ah 2016.

• In Hiigsiga 2016 ay ahaato mid loo dhan yahay.

Dhismaha Maamulada ka mid noqonaya Dawladda Federaalka waa in uu ku salaysan yahay Dastuurka kmg ah.

**Amniga:**

a) Dhismaha iyo isku dhafka ciidan qaran (Somali National Army). Si taas loo fuliyo waxaa loo qoondeeyey in maamul goboleed kasta uu soo diyaariyo 3.000 askari ah oo lagu biiriyo dowlada federaalka Soomaaliya kuwaa oo noqonaaya X.D.S.

b) In Dowladda Federaalka Soomaaliya ay taageerto maamulada xubnaha ka ah DFS, si looga hortago argagixisada guud ahaan dalka oo idil.

c) In Wasaaradda Amniga Dowladda Federalka ay abuurto xiriir iyo iskaashi joogta ah oo u dhexeeya wasaaradaha amniga ee maamulada xubnaha ka ah Dowladda Federaalka Soomaaliya.

d) In la diyaariyo qorshe mideysan oo looga saarayo Ururka al shabaab, deegaannada wali gacantooda ku harsan.

e) In sida ugu dhaqsaha badan loo sameeyo Guddiga Ammaanka Qaranka sida ku cad Dastuurka ku- meel-gaarka cutubka 10aad, Qodobka 111(h) kaasoo tilmaamaya dhismaha guddiga Amniga Qaranka.

f) Si loo dardargeliyo xuraynta iyo xasilinta deegaannada waxaa beesha caalamka laga codsanayaa inay taageero buuxda ka geystaan dhismaha ciidan boolis oo ay leeyihiin maamulada xubnaha ka ah DFS, si ay u fuliyaan hawlaha sugida amniga, iyadoo degmo walbana loo qoondayey 200 oo askari boolis ah.

**Wadaagga Kheyraadka:**

Qaabka loo maamulayo khayraadka dabiiciga ah:

a) Kheyraadka dalka Soomaaliya ku jira uu yahay hanti ummadda

Soomaaliyeed wada leedahay, lana dhiiri galiyo sidii looga wada faa'idaysan lahaa.

b) In la dhiso guddi ka kooban DFS iyo dowlad goboleedyada si loo sameeyo shuruuc ku aadan qeybsiga kheyraadka dabiiciga muddo 45maalmood gudahooda.

Qaybsiga Deeqaha Caalamiga ah iyo Cahdiga cusub (New Deal)

c) Deeqaha lagu helo magaca Soomaaliyeed in loo qaybiyo si caddaalad ah iyadoo la abuurayo jawi kalsooni iyo hufnaan leh lana dhiso guddi farsamo oo ka kooban DFS iyo maamulada xubnaha ka ah Federaalka.

Baahinta maamul goboleedyada iyo degmooyinka:

In Dowladda Federaalka ay dedejiyaan dhismaha iyo dhamaystirka maamul goboleedyada.

## Soomaaliya iyo Kenya oo is af-garad hordhac ah ka gaaray arimaha Qaxootiga & Xawaaladaha



Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya Mudane Cumar C/rashiid Cali Sharmaarke, oo socdaal shaqo ku gaaray dalalka Kenya iyo Ethiopia taariikhdu markey aheyd 24 april, 2015. Ra'isul Wasaaraha oo dalka dib ugu soo soo laabtay ayaa xubno labada gole ee dawladda Somaliyeed ka kala tirsan ku soo dhaweeyeen goroonka caalamiga ah Aadan Cabdulle Cisman caalamiga ah.

Ra'iisul Wasaaraha oo saxaafadda kula hadlay garoonka caalamiga ah ee Muqdishu ayaa sheegay in

madaxda Kenya ay kala hadleen xaaladdaha qaxootiga Soomaaliyeed ee dalkaas ku nool iyo xayiraadaha lagu soo rogay qaar kamid ah xawaaladaha Soomaalidu leedahay ee dalka Kenya ka hawl gala. Wuxuu xusay in dowladda Kenya ay u muujisay sida ay uga xun yihiin xawaaladaha la xiray oo nolol u ahaa boqolaal kun Soomaaliyeed ah oo ku nool dalka Kenya.

“Waxaan u sheegnay kuna adkaynay in adeega xawaaladuhu ay ku nool yihiin boqolaal kun oo Soomaali ah. Ra’isul Wasaaraha ayaa ka codsaday dowladda Kenya in dib loo furo Xawaaladaha, waxana rajeynaynaa in todobaadyada soo socda dib ay u howlgeli doonaan, iyadoo la waafajinaayo shuruucda ay ku shaqeeyaan Bangiyada dalka Kenya.

Sidoo kale Dawladaha Somaliya & Kenya iyo hay’adda UNHCR ayaa sheegay in ay ka wada shaqayn doonaan sida ugu haboon oo uu qaxootiga ku jira xerada Dhadhaab loogu soo celin lahaa dalkooda. Arinkan ayaa ah mid u baahan in si wada jir ah laysaga kaashado, si dib u celin xasiloon aan qaxootiga ku abuurin khalkhal amni iyo nolol xumo hor leh.

Waxaa la xaqiijiyay in celinta qaxootiga aysan noqon doonin mid khasab ah, waxaa tixgelin dheeraad ah la siin doonaa sidii loo dejin lahaa degaanno aamin ah oo ay qaxootigu nolol cusub ku abuuran karaan. Mudada saddexda bilood ah ee hore loogu qabtay qaxootiga ayaa gabi ahaan meesha laga saaray. Waxaan si wadajir ah uga shaqayn doonaa sidii dadkaas Soomaaliyeed ee dalkooda uga cararay amni darida ay si nabad ah ugu soo noqon lahaayeen ayuu carrabka ku adkeeyay R/Wasaare Cumar.

Booqashada Ra’isul Wasaaraha Somaliya ayaa lagu tilmaami karaa mid soo hooysay guul ka dib

markii Dawladda Keyna ay hore u baahisay go'aan qaxootiga Soomaalida dalkooda loogu celinayo si khasab ah taariikhda markay ahayd: 11kii Bishii April,2015 iyada oo uu Madaxweyne ku xigeenka dalka Kenya William Ruto uu caddeeyay in dowladiisa ay hay'addah Qaramada Midoobay u qaabilsan Qaxootiga ee UNHCR ku wargelisay in mudoo ku siman 3 bilood ay ku xirto Xerada Dhadhaab isla markaana Soomaalida ku jirta dib ugu celiso dalkooda.

Go'aanka Dawladda Kenya ayaa abuuray walaac maxalli ah iyo mid caalamiba ah. Sidaa daraadeed, Hey'adda xuquuqda Aadaha u doodadda ee "Amnesty International" ayaa ku boorisay Kenya in ay dhawrto/ilaaliso xuquuqda iyo nabad-gelyada qaxootiga. Hay'adda ayaa ku wargelisay Dawladda Keyna, in si qasab ah lagu celiyo ku dhowaad 350,000 ruux oo Qaxooti Soomaali ah ay xadgudub ku tahay xeerka caalamiga ayada oo dowladda Kenya hore u saxiixday,

xeerka Caalamiga ah ee Qaxootiga ee la unkay sanadkii 1951 –dii, sidoo kale, Kenya waxay ku jirtaa Ururka Midowga Qaxootiga Afrika ee la asaasay sanadkii 1969.

Hadalka Madaxweyne ku xigeenka ayaa imaanaya iyadoo xadgudubyada loo geysanayo dadka Soomaaliyeed oo ku nool dalka Kenya iyo Qaxootiyada kale uu wali sii socdo, sanadkii tagay ee 2014-ka bulshada Soomaaliyeed waxaa ay la kulmeen dhibaatooyin aad u daran oo ay kula kaceen ciidanka Amniga Kenya gaar ahaan markii uu socday howlgalkii loogu magac daray "**Usalama Operation"**.

Intuu socday hawl-galkaa, kumanaan dad ah ayaa lagu qab-qabtay gudaha Kenya kuwaas oo qaarkood loola dhaqmay si arxan iyo anshax darro ah. Amnesty

International ayaa xaqiijisay qaar ka mid ah wixii dhacay intuu hawl-galkaa socday. Kenya ayaa la xiriirisay hawl-galka in ay ugu gol leedahay in ay wax kaga qabato amni darrida iyo falalka argagixisada ee muddadii dambe ku soo badanaayay degaanno badan oo dhul-waynaha Kenya ka mid. Hayeeshee, dadkii badnaa ee lagu xiray hawl-gallada ciidamada amniga ayaa ilaa iyo hadda aan laga dhex helin qaf qaxooti ah oo lala xiriiriyay fal Argagaxisinimo.

Ma ahayn markii ugu horeysay oo la soo hadal qaado dib u celinta Qaxootiga Soomaaliyeed. Bishii November sanadkii 2013-ka waxaa heshiis sadex geesood wada galay dowladda Soonaaliya, Kenya iyo hey'adda UNHCR. Heshiiskaas waxaa lagu go'aamiyay in Qaxootiga lagu caawiyo sidii iskooda dib ugu laaban lahaayeen dalkooda Soomaaliya.

Amnesty International waxaa ay dowladda Kenya ku boorisay in ay u hogaansanaato waajibaadkeeda Qaranimo iyo kan caalamiga ah ee ka saaran dhowrista xuquuqda Qaxootiga, isla markaana ay ilaaliso Qaxootiga Soomaaliyeed kuwaas oo si magan-gelyo ah ku jooga guud ahaan dalkeeda gaar ahaan kuwa ku jira xerada Dhadhaab oo lagu sheegay in ay tahay mid ka mid ah xeryaha qaxootiga ee caalamka ugu weyn([9]).

Ugu dambayn, Ra'iisul Wasaaraha ayaa si danqasha ku jirta ugu hadlay in qul-qulka dhalinyarada tahriibka u ah qaarada Yurub oo ku geeriyoonaysa maalin kasta bada u dhaxaysa Liibiya iyo Talyaaniga ay laga maarmaan tahay inay aaminaan dalkooda kana qayb qaataan dagaalka lagula jiro kooxda nabad diidka ah oo

([9]) AMNEST INTERNATIONAL.

shacabka Soomaaliyeed u diidan inay nolol helaan(10).

## Hay'adda Cilmibaarista Badaha Soomaaliyeed oo abaal marisey Shaqaalaheeda Muujiyey Hawlkarnimada:

WQ: Abdirahim Warsame Diriye.

Hay'adda CilmiBaarista Badaha Soomaaliyeed ayaa maalintii isniinta ahayd taariikhduna ahayd 18/05/15, waxay abaalmarisey shaqaalaheeda qeyb kamid ah oo muujiyey hawlkarnimo dheeraad ah kuna saabsan shaqada ay u hayaan hay'adda, abaalmarinaas oo ahayd mid ay soo qiimeeyeen gudi hoosaad ku magacaaban dalacsiinta iyo abaalmarinta shaqaalaha hay'adda, waxayna soo xuleyn shaqaalihii istaahiley in la abaalmariyo waxayna u gudbiyeen magacyada dadka muteystey abaalmarinta Guddoomiyaha hay'adda Cilmibaarista Badaha Soomaaliyeed Adm Gaas.Prof Faarax Axmed cumar (Qare).

Kadib waxaa loo agaasimey munaasabad balaaran oo lagu gudoonsiinayo shaqaalaha muteystey abaalmarinta oo lagu qabtey xarunta hay'adda ay degentahay, waxaana kasoo qayb galay marti sharaf heer sare ah, iyo dhamaan shaqaalaha hay'adda katirsan.

Ugu horeyn waxaa munaasabadda daah furey Ex. Xildhibaan C/nuur Sheekh Abdulqadir ahna G/kuxigeenka hay'adda, isagoo ku hadley magaca gudi hoosaadkii sameeyey qiimeynta abaalmarinta shaqaalaha muteystey, wuxuuna sheegay mudane C/nuur iney mudo dheer kadib ay isla afgarteyn qiimeyn kadib iney soo xulaan dadkaan maanta lagudoonsiin doono abaalmarinta lacageed, waxaan ku qiimeynay shaqadii ay u qabteen hay'adda oo ay muujiyeen karti badan ,gudiganna wuxuu u xilsaaran yahay inuu qiimeyn kusameeyo

(10)- Radio Muqdisho.net, 24 April, 2015

shaqalaha hay'adda hadba sida ay u kala karti badan yihiin.

Kadib waxaa la guda galey gudoonsiinta abaalmarinta lacageed shaqqalihii loo soo xuley inay muteysteen abaalmarinta waxaana mid mid loogu yeeray shaqaalihii, waxaana gudoonsiiyey Guddoomiyaha Hay'adda Admiral Prof Faarax Qarre mid walbana uga mahad celiyey dadaalkii uu sameeyey mudadii uu gudanayey waajibaadkiisa shaqo, gaba gabadii Guddoomiyaha Hay'adda wuxuu sheegay abaalmarintan inaysan ahayn mid katimi meel kale balse ay tahay lacago ay kasoo jareen lacagaha adeega loogu tala galay hay'adda oo ay ka hesho Wasaaradda Maaliyadda, wuxuu kaloo sheegay inaysan noqon doonin abaalmarintaan mid maanta ku eg, oo ay ahaan doonto mid sii socota ujeedkeeduna yahay sidii loo dhiiri galain lahaa shaqaalaha hay'adda kashaqeeya, waxaan leeyahay shaqaalaha maanta aan helin abaalmarinta labixiyey inay heli doonaan marka soo socota, waxayna ku xirantahay dadaalka uu sameeyo qofka shaqaalaha ah , waxaan kaloo is leenahay inay noqoto ku dayasho lagu daydo oo ay nagu deydaan hay'adaha kale ee Dowladda oo aan muujino fal kudaysho leh.

Dadkii goob jooga ahaa ayaa aad usoo dhaweyey abaalmarinta ay sameysay hay'adda maanta, waxayna sheegayn inay tahay wax ku cusub Hay'adaha Dowladda dhexdeeda inay sameeyaan abaalmarin, waxayna cadeeyeen inay tahay wax lagu dayan doono oo u noqoto hay'adda horseed dhammaan Hay'adaha Dowladda ee shaqeeya.

Hay'adda Cilimibaarista Badaha Soomaaliyeed ayaa ah mid kaduwan dhamaan sida ay u shaqeeyaan hay'adaha Dowladda marka laga eego dhanka maamul wanaagga iyo dhanka shaqo wadaaga, waxayna u shaqeysa qaab hormarsan oo ah shabakad

isku xiran, xafiis walbana qorshihiisa cadyahay, waxaana la oran karaa hawshaas waxaa horseed u ah Guddoomiyaha Hay'adda Cilmibaarista Badaha Mudane Prof Faarax Qarre oo u muujiyey shaqaalaha daacadnimo kalsooni dhameystiran, latashi dhammaan shaqaalah uu lasameeyo, waxaana xusid mudan in dhammaan shaqaalaha hay'adda uu ugu horeeyo Guddoomiyaha hay'adda ay sameeyaan shir subax kasta lagalo intaan la guda galin shaqada maalin laha ah, waxaana la iska xog wareystaa shaqada taal iyo waax walaba waxa u qabsoomey, waxaa kaloo lagu qaata duruus kala duwan oo ay soo jeediyaan shaqaalaha oo jadwaleysan maalinba qof laga faa'ideysto takhasuskiisa cilmiyeed, taasoo loola dan leeyahay in shaqaalaha ay kala faa'ideystaan qofka soo jeedinayana uu kusii heer sareeyo cilmigiisa waxayna noqotey mid si fiican looga faa'ido, noqoteyna inay waaxaha kala duwan ay kala qaataan cilmiga iyo shaqada mida kale ay hayso.

### *Hay'adda Cilmi Baarista Badaha Soomaaliyeed oo usoo bandhigtey Waxqabadkeedii Wasiirka Wasaaradda Dekedaha iyo Gaadiidka Badda.*

Taariikhdu markay ahayd 03/06/15 maalin isniin ah , waxay hay'adda CilmiBaarista Badaha Soomaaliyeed usoo bandhigtey wasiirka wasaaradda Dekedaha iyo Gaadiidka Badda mudane nuur faarax waxqabadkeedii mudadii sanadka iyo barka ahayd ay hay,adu hawlgalaysay, bandhigaas wuxuu ka dhacay xarunta wasaaradda ay ku shaqeyso ee magaalada Muqdisho, waxaa kaloo kasoo qayb galay bandhigga ay sameysay Hay'adda Agaasimaha guud ee wasaaradda, madaxda waaxyaha wasaaradda, iyo dhammaan shaqaalaha ka hawl gala wasaaradda Dekadaa iyo Gaadiidka Badda,Waxaa kaloo goob jog ahaa munaasabadda bandhiga dhammaan shaqaalaha

ka hawlgala Hay'adda CilmiBaarista Soomaaliyeed.

Intaa kadib waxaa si habsami ku dheehantahay u bilaabatey munaasabadda oo ugu horeyn uu

daah furey Prof. Farax Axmed Cumar (Farax Qarre) oo ah Gudoomiyaha Hay'adda Cilmi Baarista Badaha Soomaaliyeed, Gudoomiyaha ayaa mahad celin iyo salaam diiran u jeediyey wasiirka sheegayna fursadda dhegeysiga ah uu siiyey Hay'adda Prof. Faarax Qarre ayaa warbixin kooban ka bixiyey Hay'adda iyo talaabooyinkii ay soo martey mudadi ay jirtey iyo hadda meesha ay mareyso, wuxuuna sheegay in waxqabadka Hay'adda ay soo jeedin doonaan waaxyaha kushaqada leh oo mid mid halkan usoo istaagi doona intey socoto hawsha.

Kadib waxaa loo yeeray madax waaxeedyada ay ka koobantahay Hay'adda ayagoo mid mid usoo jeediyey waxqabadkoodii mudada ay shaqada wadeen, waxaana ugu horeyn loo yeeray madaxa maamulka iyo lacagta, madaxa waaxda Qaanuunka iyo tababaradda, madaxa waaxda Culuumta badda, madaxa waaxda deegaanka, madaxa waaxda dhaqaalaha badda, madaxa waaxda faafinta qoraalada iyo daabacaadda, dhammaan waaxyada aan kor kusoo sheegnay waxay si heer sare ah usoo gudbiyeen waxqabadkoodii oo ahaa mid muuqda oo ay dhammaan dadkii goob jooga ahaa ay u riyaaqeen waxqabadkaas.

Waxaa kaloo lasoo bandhigey Projector kasoo lagusoo bandhigey Cilimibaaris ay sameysay hay'adda taasoo laga sameeyey Xeebta Caasimadda Muqdisho waxayna ka koobneyd cilmi baaristaas mid ka hadleysa, burburinta lagu hayo deegaanka Xeebta Caasimadda,wasakheynta xeebta, iyo dabar goynta xayawaanka qubada oo ah mid joogta ah, waxaa kaloo lasoo

bandhigey wax qabad aad u weyn oo ay kubaxdey wakhti maskax iyo dhaqaaleba kaasoo ah baaris lagu sameeyey 5goobood oo loo arkey in ay kasoo socoto halis daran waxaana laga soo qaadey mid walba ciid iyo biyo kadibna waxaa lagaliyey lab si loo ogaado heerka wasakhda biyaha iyo ciidda Xeebta Muqdisho.

Waxaa xusid mudan in mar walaba faahfaahin iyo sharaxaad uu ka bixinayey meelaha qaar Prof. Faarax Axmed Cumar (Faarax Qarre) oo ah Gudoomiyaha hay’adda iyo taliyihii hore ee Ciidanka Badda, madaama uu gudoomiyaha hawsha socotey mudada dheer uu ahaa madaxa kala wadey, gabagabadii shirka ama xafladda waxaa su’aal weydiimo ah la weydiiyey hay’adda waxaana kajawaabey Gudoomiyaha Hay’adda Prof. Farax Qarre dad weynahana aad ayey uga qanceen jawaababahaas uu bixiyey gudoomiyaha.

Hay’adda markay dhameystay bandhigeedii waxqabad waxaa goobta ka Hadley Agaasimaha Guud ee wasaaradda Dekedaha iyo Gaadiidka Badda Mudane Dhagax Tuur oo soo dhaweyn u sameeyey kadib mahad celin, wuxuu mikirafoonka kusoo dhaweeyey Wasiirka Wasaaradda Mudane Nuur Faarax si uu wax uga yiraahdo bandhigii ay hay’adda sameysay Mudane Nuur Faarax ayaa aad uga mahad celiyey waxqabadkii hay’adda ay soo qabatey oo maanta halakan ay kusoo bandhigtey, wuxuuna sheegay in maanta ay u ahayd wasaaradda maalin weyn oo aad loo faa’ideystay, shaqooyinkii aan kasoo tagney waxaa kamuhimsana tan maanta naloo akhriyey oo cilmi badan aan hananey waxaa la dhihi karaa maanta uunbaan shaqeynay Wasiir Nuur ayaa codsadey in shuruucda iyo heshiisyada badaha aduunka kala saxiixdeen in lagu sameeyo aruurin iyo dib u eegid mid

walaba, maxaa saameyn ah uu nagu yeeshay, waxaa kaloo uu jawaab kabixiyey Wasiirka guri ay codsatey Hay'adda iney degto oo ay xarun ka dhigato in uu kala shaqeeyo Agaasimaha guud sidii loo helilahaa, waxaa kalo uu balan qadey wasiirka in golaha wasiiradda la horgeeyo cilmibaaristaan laga sameeyey dhul xeebeedka caasimadda iyo dhibaatooyinka kasocda si looga hor akhriyo.

***<u>Bandhig loo sameeyey Golaha Wasiiradda Xukuumadda Federaalka Soomaaliyeed.</u>***

Kadib balan qaadkiii uu sameeyey wasiirka wasaaradda Dekedaha iyo Gaadiidka badda inuu horgeyn doono golaha wasiiradda barnaamijkan si looga hor akhriyo waxaa suurta gashey taariikhdu markay ahayd 06/06/15 maalin Khamiis ah sida caadada ah ay fariistaan Golaha Wasiiradda xukuumadda in la horgeeyo waxqabadka hay'adda, waxaana laga hor akhriyey waxqabadkii iyo Cilmibaaristii ay sameysay hay'adda oo ay kasameysay deegaan badeedka caasimadda muqdisho iyo jawaabti kasoo baxdey ciidii iyo biyihii laga qaadey Xeebta, golaha wasiiradda ayaa aad ula dhacey waxqabadkaas waxayna muujiyeen mahad celin ballaaran dhamaan xubnaha wasiirada ah, ugu danbeyna waxaa mahad celin iyo balan qaad sameeyey iyo wada shaqeyn buuxda Reysul Wasaaraha Xukuumadda Mudane Cumar C/rashiid Cali Sharmaake oo amaanay waxqabadka hay'adda wuxuuna soo jeediyey in halkaa laga sii wado shaqada lahayo wixii karaankayaga ahna waan ka qayb qaadanaynaa haddaan nahay xukuumadda.

Ma ahan markii ugu horeysay ay Hay'adda CilmiBaarista Badaha Soomaaliyeed ay ka hor akhriso waxqabadkeeda, waxay sidan oo kale ka hor akhrisey Reysul Wasaarihii hore Mudane C/wali Sheikh Axmed, asagana aad ayuu u bogaadiyey Hey'adda Cilmibaarista Badaha madaxdeeda iyo cilmibaarayaasheeda intaba.

Guddoomiyaha Hey'adda Prof Faarax ayaa asagana u ballan qaaday G. Wasiiradda inay hey'addu ay sii wadi doonto dadaalkeeda cilmiyeed.




## Xisaab:

Waxaa macallinkii kalaaska 12aad ee D/S weydiiyey ardadii: waa imisa iskudarka xisaab laga billaabo kow ilaa boqol, waxaa durbadiba ka jawaabay GAUSE xisaab yahankii caanka ahaa una dhashay Jarmalka, wuxuunna yiri: iskudarka 1 ilaa 100= 5050.

Xalka xisaabtu waa sidaan:

Formulaha Arthimetic Progression = $C = \frac{a+b}{2} x2$

C = wadar xisaabta min 1 ilaa 100

a = waa 1 (bilowga tirade)

b = waa 100 (dhamaadka tirade)

2 = waa 100 (tira cadadka)

Hadda $C = \frac{1+100}{2} x100 = 5050$



## Dhoola caddeyn:

1. Imam abuu Xaniifa ayaa xirkiisa ku yiri: Tinta cirrada noqotay iga siisiib ardaygii ayaa ku yiri: cirrada way ku badataa siisiibidda (ayaa la yiri). Abuu Xaniifa: Hadaba iga siisiib tinta madow si ay u badato.
2. Nin sheikh weyn ah aya waxaa uu yimid nin: ku yiri shiikhow waxaa igu dhacaday janaabo, waxaana tagay badda si aan uga qubeysto; waxaan tagay badda dhexda meel moolkeedu gaarayo joogeyga, dabadeed waan fadhiistay waana qubeystay; hadaba su,aasha aan ku weydiinayo waxa ay tahay; <u>Janaabadii ma ka daahirowbay</u> ? shiikhii ayaa ugu jawaabay: Iska tag salad iyo soon toona lagaama rabo; markii ninkii uu tagay ayaa xertii waydiisay shiikha: side aan looga rabin ninkaan salad iyo soon. Shiikhii waxa uu ku jawaabay salad iyo soon iyo cibaado oo dhan waxaa u shardi ah Caqli; ninkaan oranaaya badda hoosteeda

   Ayaan fadhiisatay; daahirnimadeydana shaki ayaan ka qabaa, miyaa caqli leh oo mukalaf noqon kara.
3. Magaaladan muqdisho waxaa lagu sheegayay nin dhigay xaflada layskula Nikaaxinayo hooyadii iyo

Aabihii oo is qabay mudo 40sano ah. Hadii la warsaday: maxay isku nikaaxsadeyn waalidku, Wuxuu ku jawaabay, waay is Masaafeysteen; waxaa lagu yiri ninkii: Carruurtoodii aad ka mid tahay maxay noqon. Wuxuu yiri: waa carruur gogol (Walad al-firaash).

4. Nin ayaa lagu yiri: waligaa ma lagu habaaray, wuxuu ku jawaabay: Yaaba howl kale qabsan jiray.
5. Nin ayaa safar ka yimid; wuxuu waydiyay carruurtiisi meeye hooyadiin. Waxay ku yiraahdeen: waxay la joogtaa islaamankaas ku jira Nabi amaanka… markaas ayuu yiri: hooyadiin Nabi amaan mataqaane, Ilaahow aysan igu caayin Nabi (waxaan ka rajeynayna in ay dumarka raali naga noqdaa).